

Helitaanka Codka Guud ah



HAGAHA SHARCIGA

AH EE KIRADA VERMONT

SI WADAJIR AH U SOO SAAREEN



1-800-287-7971

1-802-864-0099

www.cvoeo.org



1-888-569-7368

1-802-985-2764

www.vtlandlord.com

HORDHAC

Kireyntu waa waddo laba jiho ah. Qaabka ugu wanaagsan ee mulkiilayaasha iyo kiraystayaashu ay khibrad guul leh u mari karaan waa inay wada shaqeeyaan. Kirayntu sidoo kale waa xidhiidh sharci ah. Waxa ay ugu wanaagsan tahay marka dhammaan dhinacyadu u arkaan inay tahay Xidhiidh Ganacsi.

Buuggan hagitaanka waxa si wadajir ah u qoray 2015 kii Pamela Favreau-Zugaro, oo ahayd agaasimihii hore ee barnaamijka Kiraystayaasha Vermont ee CVOEO iyo Angela Zaikowski, Esq., oo ah Agaasimaha Jimciyadda Kireeyayaasha Vermont, iyada oo wax ka beddelo ay ku sameeyeen CVOEO Ogosto 2021 kii iyo Sibtember 2023 kii.

Sabab? Waayo waxa aanu aaminsanahay in xidhiidhka mulkiilaha/kiraystaha aanay qasab ahayn in uu noqdo mid muran dhaliya. Xidhiidhka wanaagsan iyo is ixtiraamka ayaa badanaa ka baajiya culays badan oo soo wajihi lahaa qofwalba. Khibraddu waxa ay na tustay in mashaakilka ka yimaadda xaalad kiro ay badanaa ka dhalato labada dhinac oo aan fahansaneyn xuquuqdooda iyo masuuliyadaha sharciyeed. Buug Hagitaaneedkan waxa la qoray iyada oo lala kaashanayo ururadeena iyada oo rajadu tahay "isle'ekaanta fursadaha cidwaliba helayso." Waxa aanu aaminsanahay in labada dhinacba ay tahay inay ogaadaan xuquuqda iyo masuuliyadaha dhinaca kale iyo sidoo kale kuwoogaba.



FARRIINTAYADA KU SOCOTA KIRAYSTAYAASHA

Bixi kharashka kiradaada wakhtiga loogu talagalay lana xidhiidh mulkiilaha ama maareeyaha guriga. Waxa aanu labaataneeyo kiraystayaal ah ka maqalnay in loo saaray sabab la xidhiidha in arrimuhu gacantooda ka bexeen halkii ay kahortag sameyn lahaayeen. Ha noqon mid kamid ah kuwaas.

Inta badan waxyaabaha ay doonayaan mulkiilayaashu waa wax iska fudud; waxa ay kaa filayaan inaad bixiso kharashka kirada wakhtiga loogu talagalay, inaad daryeesho gurigooda, isla markaana aad u sheegto marka dayactiro loo baahan yahay.

FARRIINTAYADA KU SOCOTA MULKIILAYAASHA GURYAHA

Guriga kirada ah ee duugooba isla markaana u baahda dayactir iyo hagaajin waxa uu si cad oo qeexan u cadaynayaa inaad daneyneyn. Waxa aad weydiisa naftaada sababta kiraystayaashu ay tahay in daneyn daryeel ay muujiyaan haddii adigu aanad muujineyn. Ku hanweynaan Lahaansho waa nidaam ganacsi oo fariidnimo ku jirto.

Inta badan waxyaabaha ay doonayaan kiraystayaashu waa wax iska fudud; in dayactirada la sameeyo marka loo baahdo iyo in aan lagu soo noqnoqon si ay gurigooda ugu raaxaystaan.

QIRAALO

Daabacaadda asalka ah ee Buug Hagitaaneedkan waxa lagu suuragaliyey oo mahadda iska leh deeq ka timid Wakaaladda Vermont ee Horumarinta Ganacsiga iyo Bulshada (ACCD). Taageerada farsamo ee wakaaladda ayaa sidoo kale mahad ballaadhan iska leh. Muraajacadii iyo turjumaaddii 2023 waxa lagu suuragaliyey oo mahadda iska leh deeq labaad oo ka timid ACCD iyo sidoo kale lacag dheeraad ah oo laga helay Deeqda Dawladda ee Adeegyada Bulshada (CSBG) iyo Xafiiska Horumarinta Bulshada & Dhaqaalaha (CEDO) ee Magaalada Burlington ee (CSBG).

JADWALKA MAWDUUCYADA

- 1 **QAYBTA 1. KAHOR INTA AANAD KIRAYSAN**
[Miyey Shuruucdu I Khuseeyaan Aniga?](#)
- 2 [Talooyin Loogu Talagalay Dadka Raadinaya](#)
[Abaarmanada](#)
[Talooyin Loogu Talagalay Mulkiilayaasha](#)
- 3 [Sameynta Indho-Indhaynta](#)
- 4 [Debaajiyada](#)
- 5 [Caymiska Labada Dhinacba](#)
- 6 **QAYBTA 2 – HESHIISYADA KIRADA**
[Adeegsiga Heshiiska Kirada ee Qoraalka ah](#)
- 7 [Fiiyada Habsanka iyo Fiiyada Ganaaxa](#)
[Heshiisyada Kiro ee Kiraystaha Masuul uga Dhigaya](#)
[Dayactirada](#)
- 8 [Heshiisyada Kiro ee Mamnuucaya Martida](#)
[Shuruudaha Joojinta Heshiiska Kirada](#)
- 9 **QAYBTA 3 - ILAALINADA SHARCIYEED**
- 10 [Sharciga Guryeynta Cadaaladda ah](#)
- 12 [Takoorka Ku Salaysan Xaaladda Qoyseed](#)
- 13 [Takoorka Ku Salaysan Naafanimada](#)
[Daryeelayaasha La Nool Qofka ee Dadka](#)
[Naafada ah](#)
- 14 [Wax Ka Beddelada Macquulka ah](#)
- 15 [Fudaydinada Macquulka ah](#)
- 16 [Xayaysiinta & Sharciga Guryeynta Cadaaladda ah](#)
- 17 [Aargoosiga Sharci Darrada ah](#)
- 18 [Xuquuqda iyo Galaangal U Helidda Qarsoodinimada](#)
- 19 [Kordhinta Kirada](#)
- 20 **QAYBTA 4 – XEERARKA GURYEYNTA**
[Damaanadda Ammaan Ahaanshaha Guriga](#)
- 21 [Shuruudaha U Hogaansanka](#)
- 22 [Cayayaanka iyo Jiirka](#)
- 23 [Qaybaha Qaabdhismeed](#)
- 24 [Adeegyada Guriyeed](#)
[Ammaanka Dabka](#)
- 25 [Rinjiiga Lead ka](#)
- 27 [Ku Ilaalinta Guriga Xaalad Wanaagsan](#)
- 28 [Dayactirka iyo Ka Jaritaanka](#)
[Ka Haysashada Kharashka Kirada](#)
- 29 [Haddii Mulkiiluhu aanu Bixineyn Biilasha Adeegyada](#)
[Guriga](#)
- 30 **QAYBTA 5 - MASHAAKIL CAAM AH**
[Mashaakilka Ka Dhex Dhaca Jaarka](#)
- 31 [Daryeelka Cawska iyo Qaadista Barafka](#)
[Baarkinka](#)
[Dhiishashka Satalaytka iyo Aantaynada TV ga](#)
- 32 [Weecinta Kharashka Adeegyada Guriga](#)
[Qalabka Ku Shaqeeya Korontada](#)
- 33 **QAYBTA 6 – GUURITAANKA**
[Jebinta Heshiis Kiro](#)
- 34 [Shuruudaha Wargelinta Kiraystayaasha Guuraya](#)
[Filashooyinka Shuruudaha Guuritaanka](#)
- 35 [Dib U Celinta iyo Khilafaadka Ka Yimaadda](#)
[Debaajiga](#)
- 36 [Hantida aan La Sheegan Kadib Ka Guuritaanka](#)
[Tixraacyo](#)
- 37 **QAYBTA 7 – JOOJINTA KIRADA EE UU**
SAMEEYO MULKIILUHU
[Joojinta Kirada ee ay Sababto Bixin La'aanta](#)
[Kharashka Kirada](#)
- 38 [Wargelinta Joojinta "Sabab Awgeed"](#)
- 39 [Joojinta Kirada "Sabab La'aan"](#)
[Wargelinta Marka La Kiraysto Guriga Shakhsiyeed](#)
[ee Mulkiilaha](#)
- 40 [Wargelinta Iibinta Dhismaha](#)
[Wargelinta La Wareegidda](#)
[Saarista Shaqaalaha Beerta](#)
- 41 [Dhammaadka Muddada Wargelinta](#)
- 42 **QAYBTA 8: MAXKAMADDA**
HANNAANKA SAARISTA
- 43 [Eraybixinta Saarista](#)
[Hannaanka Maxkamadda](#)
- 44 [Dhegaysiyada Meeldhexe Dhigista Lacagta "Rent](#)
[Escrow"](#)
- 45 ["Cabashada"](#)
["Jawaabta"](#)
[Dhegaysiga Kama Dambeysta ah](#)
- 46 [Amarka Qoraalka ah ee Lahaanshaha](#)
[Hantida Kiraystaha Kadib Ka Saarista](#)
- 47 **QAYBTA 9- KA TEGISTA**
GURI KIRO
[Hantida aan La Sheegan Kadib Ka Tegista Guriga](#)
- 48 **LADHKA A:** [Agabka](#)
- 72 **LADHKA B:** [Khayraadka](#)

QAYBTA 1: KAHOR INTA AANAD KIRAYSAN

MIYEEY SHURUUCDU I KHUSEEYAAN ANIGA?

"Heshiis kireed" waxa uu ka dhigan yahay dhammaan heshiisyada, qoraalka ah ama afka ah, ee ay ku jiraan xeerarka iyo shuruudaha la xidhiidha adeegsiga iyo deganaanshaha guri iyo dhismayaal deganaanshiyo.

"Kireeye" waxa uu ka dhigan yahay mulkiilaha, kireeyaha, ama halka ay habboon tahay, sii kireeyaha guri ama dhisme deganaanshiyo oo uu qayb ka yahay.

"Kirayste" waxa uu ka dhigan yahay qof xaq ugu leh sida uu dhigayo heshiis kireed in uu dego guri deganaanshiyo oo aanay cidkale la degayn.

Haddii aan soo koobo, tani waxa ay ka dhigan tahay in haddii aad u ogolaato qof in uu ku noolaado dhisme aad leedahay, ha noqoto fiilo, ama qol ku yaalla hoygaaga, waxa aad tahay **Kireeye**. Tan waxa kamid ah kireyste koowaad oo kasii kireeya cid qolka la wadaagta. Uma baahnid inaad lahaato qolka aad sii kiraynayso si aad u qaadato doorka Kireeyaha.

Maadaama oo sharciga Vermont aanu waajibineyn heshiis kiro oo qoraal ah, waxa lagu tixgelinayaa inaad tahay **Kirayste** haddii aad leedahay ama aanad lahayn heshiis qoraal ah. Xuquuqda iyo masuuliyadaha labada dhinac ee lagu sheegay buuggan ayaa la dabbaqayaa.

[Sharciga Vermont ee La Sharxay, Cinwaanka 9, Cutubka 137 § 4451. Qeexitaanada](#)

** "V.S.A." ayaa sidoo kale aad loogu adeegsanayaa buuggan. Waxa ay ka dhigan tahay Sharciga Vermont ee La Sharxay waxana ay sheegaysaa sharciyada gobolka Vermont. Kuwan waxa lagu tilmaamaa **CINWAAN** (tiro), **CUTUB** (mawduuca ay ka hadlayaan), iyo **QAYBTA** (tafaasiisha sharciga).*

KA REEBITAANADA

Macluumaadka ku jira buuggan ma khuseeyaan waxyaabaha soo socda:

- Degitaanka mu'asasad dadweyne ama gaar ah oo ka hawlgasha ujeedka ah bixinta adeeg caafimaad, daryeel waayeel, waxbarasho, la talin, diineed, ama kuwo lamid ah.
- Degitaanka hoos yimaadda heshiis iib guri deganaanshiyo ama guri qayb ka ah, haddii cidda degaysaa ay tahay iibsadaha ama cidda ku xigta maslaxadda iibsadaha.
- Degitaanka xubin kamid ah urur walaalnimo, bulsheed, ama diimeed qayb kamid ah dhisme oo uga hawlgala waxtarka ururka.
- Degitaanka ku meelgaadhka ah ee huteel, motel, ama hoy inta lagu gudo jiro wakhtiga degitaanku waa mid hoos yimaadda cashuurta qolalka iyo cuntooyinka (30 maalmood).
- Degitaanka mulkiilaha ee dhisme deganaanshiyo ama qofka ku qoran heshiis guri oo iskaashi.
- Kirada dhul guri guurguura oo uu maamulo [10 V.S.A. cutubka 153](#).
- Degitaanka ku meelgaadhka ah ee dhul kaam, kaas oo ujeedooyinka cutubkan awgood ka dhigan wixii hanti ah ee loo adeegsado ujeedooyin fasax ama madadaalo oo muddeed ama wakhti kooban kuwaas oo ay ku yaallaan kaabino, teendhooyin, ama meelo yaryar, ama goobo loogu talagalay in si ku meelgaadh ah loogu rakibto guryo deganaanshiyo kaam, madadaalo, ama socdaal oo guurguura, oo ay kamid yihiin teendhooyin, gawaadhi kaam, ama madadaalo sida gawaadhida sida guryaha loo dego, isjiidyada safarka, taraagyada kaamka, iyo xaajiyadaha kaamka.


TALOOPYIN LOOGU TALAGALAY KIRAYSTAYAASHA IYO MULKIILAYAASHA

TALOOPYIN LOOGU TALAGALAY DADKA RAADINAYA ABAARMANNADA:

- Xaqiiji inaad awooddo kharashka kirada. Adeegso [xaashida miisaaniyadda](#) ee ku taalla qaybta “Agabka” ee Buug-hagitaaneedkan.
- Mulkiilaha ama wakiilka kiraydu kugu masoo dallici karaan fii codsi.
- Weydii haddii aad heli karto heshiis kiro oo qoraal ah. Weydii muddada kiradu socon doonto (muddada kirada).
- Weydii cidda bixinaysa kharashka adeegyada guriga. Haddii aad bixin doonto kharashkooga, weydii inta qiimahoodu yahay. Waxa aad wacdaa shirkadaha adeegyada guryaha si aad u eegto in qiimeynada mulkiiluhu uu kuu sheegay ay sax yihiin.
- Haddii mulkiiluhu uu bixiyo kharashka kulaylinta, weydii cidda xakameynaysa heerkulka abaarmanka.
 - Haddii uu mulkiiluhu xakameynayo, weydii heerkulka uu ku buuxinayo jiilaalka. Shuruucdu waxa ay waajibinayaan ugu yaraan heerkul ah 65°F.
- Ha ka cabsan inaad tixraacyada ka hubiso mulkiilaha, weydii dadka hadda deggan sida khibraddoodu ahayd.
- Hubi dhammaan nidaamyada daruuriga ah:
 - Laambadaha
 - Biyaha
 - Qaybisoooyinka
 - Shooladda
 - Dareemayaasha qiima iyo kaarboon moono ogsaydhka joogtada ah, ee isku xidhan
- Tixraacyada hubinta mulkiilayaasha. Haddii aad mushkilad ka wajahdo tixraacyada, [Kiraystayaasha Vermont](#) ayaa ku caawin kara. Wac iyaga.
- Mulkiilayaasha qaar sidoo kale waxa ay hubiyaan Warbixinada Deynbixinta. Haddii aanad hubin qiimeynta deynbixintaada, ama aad caawimo uga baahan tahay hirgelinta ama dayactirka [Barnaamijka Mustaqballada Dhaqaale](#) ee CVOEO ee ku qoran [Khayraadka](#) ku qoran halka dambe ee buuggan.
- **Heshiiska kiro waa mid shaqaynaya isla marka la saxexo, ee ma aha kadib marka loo soo guuro.** *Xaqiigso inaad fahanto waxa heshiiska kiro sheegayo kahor inta aadan saxexin!* *Waxa aad la xidhiidhaa [Kireystayaasha Vermont](#) haddii aanad hubin.*

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA:

- Marka aad xayeysiinayso guri, sharrax guriga, ha sharxin deganayaasha aad jeceshahay. Ka eeg sidoo kale qaybta [Sharciga Guryeynta Cadaaladda ah](#).
- Fiiyada Codsigu ma aha kuwo ka sharcieysan gobolka Vermont.
- Waxa aad codsan kartaa in codsaduho uu keeno nuqul ah warbixinta deynbixintooda iyada oo qayb ka ah hannaanka codsiga.
- Hubi tixraacyada! Su'aalo wanaagsan in la isweydiiyaa waa:
 - Ma la bixiyey kharashkii kirada wakhtigii loogu talagalay?
 - Kiraysuhu ma baxay isaga oo aan wax lacag ah lagu lahayn?
 - Qofka markale ma ka kireyn lahayd guri?
- Hubi in wixii dayactiro ah ee loo baahan yahay la sameeyey kahor inta aanay kiraystayaasha cusubi soo gelin guriga.
- Marka aad diidayso codsade, waxa aad codsadeyaasha u diidi kartaa sababaha soo socda:
 - Codsii aan dhamaystirneyn
 - Tixraac taban
 - Taariikh kiro oo aanu lahayn
 - Diiwaan faldembiyeed
 - Deynbixin ka hoosaysa heerka - waxa aad dejin kartaa heerka, balse u dabbaq si joogto ah
- Hubi inaad u dabbaqdo dhammaan siyaasadahaaga codsiga si joogto ah.



SAMAYNTA INDHO-INDHAYNTA

Labada dhinacba waa inay si wadajir ah u sameeyaan indho-indhayn kahor inta aanu kiraystuhu degin guriga. Xaaladda guriga waa in lagu dukuminti gareeyaa qoraal ahaan. Waxa jira foomam loogu talagalay ujeedkan oo [laga heli karo qaybta "Agabka"](#) ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.


TALOOYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

Haddii mulkiiluhu aanu sameyn indho-indhayso ama aanu waxyaabo qorin:

- Sawiro qaad kahor inta aanad soo guurin!
- Qor liis ah dhammaan waxyaabaha jajaban iyo shayada u baahan in la hagaajiyo, nuqul ka samee oo u dir mulkiilaha adiga oo ka dalbanaya in dhammaan agabyada la dayactiro.
- Hubi inaad taariikhda ku qorto waraaqda.
- Ku hayso nuqulkaaga meel ammaan ah
- Taxaddir marka aad qaadayso qalabka guriga. Haddii aad xoqdo gidaarrada ama dhulka mulkiiluhu waxa uu ku saari karaa masuuliyadda waxyeellada.

TALOOYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Ku samee indho-indhayn guriga wakhtiga loo soo guurayo si aad u dukuminti gareyso xaaladda uu ku sugan yahay gurigu.
- Ka dalbo kiraystaha in uu saxeexo waraaqda usoo guuritaanka si uu u xaqiijiyo xaaladda.
- Qaad sawiro ama muuqaal si aad dukuminti gareyso xaaladda gurigu ku sugan yahay wakhtiga usoo guuritaanka.
- Haddii adiga iyo kiraystuhu isku waafaqdaan in dayactiro loo baahan yahay, waxa aad ku socon kartaan dayactirada (waxa aad xattaa ka dalban kartaa kiraystaha in uu saxeexo si uu u xaqiijiyo in dayactirada la dhamaystiray).



DEBAAJIDA

Aragtida dadka ku dhex baahsan ee ah in mulkiile aanu dalban karin kirada bisha koowaad, kirada bisha u dambeysa, iyo debaaji waxa ay ahayd khuraafaad muddo badan lasoo aaminsanaa. Dhab ahaan tani marnaba sax ma ahayn. Keliya Burlington iyo Brattleboro ayaa ku xaddida debaajidu inaanay ka badan hal bil kiradeed. Meelaha kale ee gobolka kamid ah, wax xaddidaad ah ma laha debaajidu.

- Sharciyada Burlington iyo Brattleboro waxa ay sidoo kale u ogolaadaan mulkiilaha in uu u qaato wax aan ka badneyn kiro bil badhkeed debaaji xayaanka carbiska ah taas oo dheeraad ka ah debaajida.
- Sharciyada Burlington waxa ay sidoo kale ku waajibiyaan mulkiilaha in uu debaajiyada dhigo akown leh dulsaar. Dulsaarka waxa la siiyaa kiraystaha marka debaajida la celinayo.
- Lacag kasta oo la qaddimo si loo xasiliyo kiro waxa loo yaqaan "debaaji." Tan waxa kamid ah damaanadda, waxyeellada, nadaafadda, debaajida xayawaanka carbiska ah, ama kirada bisha u dambeysa.
- Mulkiilayaashu kuma dallici karaan debaajida xayawaanka carbiska ah Xayawaanka Kaalmada ee loogu baahan yahay in uu Fudaydin Macquul ah u noqdo kirayste naafo ah.
- Ma jirto wax la yidhaa debaaji "aan la soo celineyn".
- Kiraystayaashu debaajida uma adeegsan karaan kirada bisha u dambeysa.
- Mulkiilayaashu waxa ay debaajida ka goosan karaan lacagta kirada aan la bixin, biilasha adeegyada guriyeed ee aan la bixin, kharashka saarista iyo ka takhalusidda hantida shakhsiyeed ee kiraystaha, iyo waxyeellooyinka soo gaadhay guriga ee ka baxsan duugowga caadiga ah.
- Debaajida looma haysan karo "ganaax" ah jebinta heshiis kiro.
- Debaajida waxa loo haysan karaa kirada sida uu dhigayo heshiiska kirada haddii kiraystuhu baxo xilli hore isla markaana mulkiiluhu uu awood u yeelan waayo in uu dib u kireeyo guriga.


TALOOYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

Inta lagu gudo jiro kiradaada:

- Sharciga Vermont – [9 V.S.A. cutubka 137 §4451\(5\)](#) waxa uu dhigayaa in kiraystayaasha la saari karo masuuliyadda "dayacaadda, daryeel la'aanta, shilka ama ku xadgudubka dhismaha ama qalabka ama waxyaabaha guriga yaalla ee uu sameeyo kiraystaha ama xubno kamid ah qoyskiisa ama qoyskeeda ama dad uu casuumay ama martiidiisa."
- Si dhakhso ah u soo sheeg baahiyaha dayactirka.
- Wax ka beddel ha sameyn adiga oo aan ogolaansho qoraal ah ka haysan Kireeyaha.
- Guriga ula dhaqan si ixtiraam leh.
- Wargelin habboon bixi kahor inta aanad ka guurin. Waxa ku jirta wargelin muunad ah qaybta "[Agabka](#)" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.
- Haddii aad jebiso heshiiska kiradaada adiga oo ka guuraya kahor inta aanu dhammaan heshiiska kiradu, waxa dhici karta inaad masuul ka noqoto inaad siiso mulkiilaha kharashka kirada illaa mulkiiluhu uu dib u kireyn karo guriga.

TALOOYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Hubi inaad ka qaadato wixii kharash debaaji ama kiro ah kahor inta aanay kiraystayaashu usoo guurin guriga.
- Inaad kharashka ka jarato wixii waxyeello ah ee soo gaadha guriga marka kiraystayaashu ka baxayaan guriga waxa ay aad u fududahay marka aad dukuminti gareysay xaaladda uu ku sugnaa gurigu wakhtigii soo guuritaanka.



CAYMISKA LABADA DHINACBA

WAXYEELLADA SOO GAADHA HANTIDA KIRAYSTAHA

Waxyeeellada soo gaadha guriga shakhsiyeed ee kiraystaha guud ahaan ma aha mid uu masuul ka yahay mulkiiluhu iyada oo moojee waxyeeelladu ku timid dayacaad ka timid dhanka mulkiilaha. Haddii abaarmankaagu noqdo mid aan lagu noolaan karin dab, baybab qarxay, iwm awgood, caymiska kiraystaha ayaa bixin doona "kharashaadka nolosha ee dheeraadka ah." Guud ahaan, taasi waxa ay ka dhigan tahay in lagu siiyo kharash si aad ugu noolaato meelkale, sida abaarman kale oo qiime ahaan ku dhaw gurigaagii hore.

Siyaasaduhu badanaa waxa ay caymiyaan waxyellooyinka soo gaadha hantidaada shakhsiyeed oo ah illaa 17 khatar, oo ay kamid yihiin: *dab ama danab, duufaana ama baraf dhagaxyaale ah, qarax, rabshad ama khalkhal dadweyne, diyaarad, gawaadhi, qiig, kharibaad ama waxyello xun, xatooyo, waxyello ay geysato quruurad ama agabka quruuradda ammaanka ee qayb ka ah dhismaha, burqasho fulkaano, walxo soo dhaca, miisaanka barafka, baraf, ama barafka saafiga ah, waxyello la xidhiidha biyo oo ka yimaadda adeegyada guriyeed, iyo waxyello qulqul koronto ka dhalatay.*

Waxa aad arki kartaa, laakiin, in daadadka iyo dhulgarriradu aanay ku jirin liiska. Haddii aad ku nooleyd aag u nugul kuwaas, waa inaad iibsato siyaasad ama ladh gaar ka ah siyaasaddaada kiraystaha. Qaar aagagga xeebaha ah, halkaas oo duufaanaadu ay sababi karaan burbur laxaad leh, waa inaad sidoo kale iibsato ladh gaar ah si lagaaga bixiyo kharashka waxyeeellada duufaanka.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Waxa aad loogu talinayaa in dhammaan kiraystayaashu iibsadaan caymiska kiraystaha.
- Haddii ay mushkilad kaa haysato guriga taas oo aan wax laga qaban isla markaana ay khatar gelin karto gurigaaga, waxa aad codsi qoraal ah u dirtaa mulkiilaha aad kaga dalbanayso in mushkiladda wax laga qabto. Hayso nuqul.
- Dhibaatooyinka xilliyeed sida barafka ururay ee kasoo laadlaada aagagga baarkinka badanaa looma tixgeliyo dayacaad. Kor eeg kahor inta aanad baarkinka dhigin gaadhigaaga! Joogtee caymis gaadhi oo munaasab ah.
- Haddii waxyello uu gurigaaga ku sababo kirayste kael, ma aha mid uu masuul ka yahay mulkiiluhu.
- Waxa aad ka eegtaa qaybta "Agabka" wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan [Caymiska Kiraystaha](#).

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Gurigaagu waa in uu yeeshaa kharash bixin caymis dhismeed iyo masuuliyadeed oo habboon.
- Waxa aad kala shaqaysaa wakiilkaaga xaqiijinta inaad qiime kugu filan haysato oo aad ku bixin karto kharashka beddelka dhismaha.
- Filnaansho la'aanta caymiskaagu waxa ay sababi kartaa in shirkadda caymisku qiimeyso ganaaxa dhaqaale in la qiimeeyo marka sheegasho la sameeyo.
- Si dhakhso ah ugu sheeg sheegashooyinka kiraystaha ee dhaawaca shakhsiyeed ama waxyeeellada guriyeed wakiilkaaga. Inaad sidaas samaysaa waxa ay kaa ilaalinaysaa in shakhsi ahaan masuuliyad lagugu saaro dacwad.
- Ka eeg qaybta "Agabka" wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan [Cayminta Guryaha Kirada ah](#).




QAYBTA 2: HESHIISYADA KIRADA

Kirayntu waa heshiis sharciyeed oo u dhexeeya "Kireeye" (mulkiile) iyo "Kirayste" (kirayste). Vermont, xuquuqda iyo masuuliyadaha labada dhinacba waxa ilaaliya sharciga, xattaa haddii aanu jirin heshiis kiro oo qoraal ah.

Sharciga Vermont waa uu adeegsadaa erayga "Heshiiska Kirada," kaas oo lagu qeexo "dhammaan heshiisyada, qoraalka ah ama afka ah, ee ay ku jiraan xeerarka iyo shuruudaha, la xidhiidha adeegsiga iyo deganaanshaha guri iyo dhisme deganaanshiyo." [9 V.S.A. §4451](#)

Taas marka laga yimaaddo, sharciyada VT waxa ay caddeeyaan in aanay jirin wax heshiis kiro ah oo ka koobnaan kara luuqad baalmarsan sharciyadan. Shuruudahaas waxa loo tixgeliyaa kuwo aan la fulin karin xattaa haddii heshiiska ay saxeexaan labada dhinacba. Shardiga aan la fulin karin ma burinayo dhammaan heshiiska kirada. Sidaas si lamid ah, hal dhinac oo jebiya shardi kamid ah heshiiska kiro ma burinayo dhammaan heshiiska kiro. [9 V.S.A. §4454](#)



ADEEGSIGA HESHIIS KIRO OO QORAAL AH

Waxa badanaa u wanaagsan heshiisyada kirada in ay noqdaan qoraal. Waxa ay ka hortagtaa isfahanwaa iman lahaa hadhaw.

Labada dhinacba waa inay fahan cad ka qaataan waxa shuruudaha heshiiska kiradu ka dhigan yihiin.

GOORTA MASHAAKILKU DHACAAN

Heshiiska kiradu waxa uu sheegaa flashooyinka labada dhinacba. *Bogagga soo socdaa waxa ay ka kooban yihiin talooyin ku socda labada dhinac ee galaya heshiis kiro oo qoraal ah.*

TALOoyIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Marnaba ha saxeexin heshiis kiro adiga oo akhriya isla markaana fahma dhammaantii moojee.
- Dib ayaa laguugu eegi karaa heshiis kiro adiga oo la xidhiidhaya [Kiraystayaasha Vermont](#).
- Heshiis kiro waxa uu noqdaa sharci marka aad saxeexdo, MAAHA taariikhda soo guuritaanka.
- Xaqiiqso kahor inta aanad saxeexin!
- Ku hayso nuqulkaaga meel ammaan ah, oo aad gaadhi karto.
- Haddii mulkiiluhu aanu ku siin nuqul, ku codso qoraal ahaan oo hayso nuqul ah warqadda.

TALOoyIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Adeegsiga heshiis kiro oo caam ah oo laga soo saaray internet ka ama laga helay dukaan badanaaba dantaadu kuma jirto. Shuruudaha heshiiska kiro waa inay waafaqaan sharciyada gobolka gurigaaga kiradu ku yaal.
- Heshiiska kirada ee aad hadda adeegsanayso waxa dib u eegis kuugu sameyn kara [Jimciyadda Kireeyeyaasha Vermont](#).
- Heshiis kiro waxa uu noqdaa sharci marka aad saxeexdo, MAAHA taariikhda soo guuritaanka.
- Waxa aad siisaa kiraystaha gurigaaga nuqul heshiiska kirada ah.
- Ha haysan wax ka badan hal heshiis kiro oo orijinaal ah.

FIYADA HABSANKA IYO FIIYADA GANAAXA

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Haddii lagu soo dallaco fiiga habsanka waxa aad cadeyn ka codsan kartaa mulkiilaha sheegaysa in fiigu uu la xidhiidho kharashaadka laguugu soo rogay natiijo ka dhalatay inaad la habsaantay bixinta kharashka kirada.
- Haddii mulkiiluhu ku siin kari waayo cadeyntan, waxa dhici karta inaad ku qasbanaan inaad bixiso fiiga.
- Waxa ku jirta [waraq foom ah oo loogu talagalay ujeedkan](#) qaybta “Agabka” ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Waxa aad soo dallici kartaa fiiga habsanka haddii kiraystuhu uu bixin waayo kharashka kirada wakhtiga loogu talagalay haddii:
 - Fiiga habsanku ay macquul ahaan la xidhiidho kharashkaaga ururinta. Tani waxa ay ka dhigan tahay in fiigu ay tahay in uu xidhiidh uun la yeesho kharashaadka aad soo rogay adigu haddii kiraystuhu aanu bixin kharashka kiradiisa wakhtiga loogu talagalay oo/ama uu la xidhiidho wakhtiga aad ku qaadato la socodka kiraystaha.
- Fiiga habsanka ah ee ah fii sugan oo qiyaastii ah \$20-\$25 caadi ahaan waa mid la aqbali karo.
- Fiiga habsanka ee maalintii ah lama ogola.
- Ka feker qiimo dhimis ah kharashbixinta hore halkii aad soo dallici lahayd fiiga habsanka. Qiime dhimis ah kharashbixinta hore waa abaalmarin la siiyo kiraystaha oo uu ku mutaysto bixinta kharashka kiradiisa kahor inta aan dhab ahaan la gaadhin wakhtigii loogu talagalay (waxa ay lid ku tahay ganaaxa bixinta kharashka habsanka).

HESHIISYADA KIRADA EE SAARA KIRAYSTAHA MASUULIYADDA DAYACTIRRADA

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Kiraystayaashu waa inaanay marnaba samayn wax dayactirro ah oo aanu mulkiiluhu ku ogolaan qoraal ahaan.
- Kiraystayaaha iyo mulkiilayaasha midkoodna ma sameyn karaan dayactirro u baahan farsamayaqaan liisan haysta.
- Sharci ku jira heshiis kiro oo saaraya kiraystaha masuuliyadda dayactirradu ma aha mid la fulin karo.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Mulkiilayaasha ayaa masuul ka ah inay dayactiraan guriga kirada ah.
- Haddii waxa la dayactirayo uu waxyeelleeyey kiraystaha ama martidiisu, waxa aad magdhaw ka raadsan kartaa kiraystaha.
- Mulkiilayaashu waa inay maamulaan cidda samaynaysa dayactirrada guriga iyo sida dayactirradaas loo samaynayo.

HESHIISYADA KIRO EE MAMNUUCAYA MARTIDA

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Mulkiilayaashu ma faragelin karaan xaqa kiraystuhu u leeyahay in uu qaabilo martida uu doono isagu.
- Mulkiilayaashu ma soo saari karaan wargelin gelitaan la'aan ah oo ka dhan ah martida kiraystaha.
- Haddii qof kula jooga uu leeyahay hoygiisa joogtada ah ee gaarka ah, waa marti.
- Xaaladaha martidu ay u adeegsato gurigaaga halkii ay gurigooda u adeegsan lahaayeen hoy rasmi ah waxa loo tixgelin karaa inay yihiin kuwo kula nool adiga.
- Haddii aanay lahayn gurigooda rasmiga ah ee gaarka ah, waa kuwo kula nool adiga.
- Haddii aad u ogolaato qof in uu kula dego guriga way kugu adkaan kartaa hadhaw inay kaa tagaan. Waxa aad u baahan kartaa inaad raadsato hannaan saaris sharciyeed.
- Waxa aad sidoo kale khatar gelin kartaa xaaladdaada ka kireyste ahaan. Inaad u ogolaato in uu kula noolaado qof aan ku jirin heshiiska kirada ee aad la gashay mulkiilaha waxa ay sabab u noqon kartaa joojinta kiradaada.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Mulkiilayaashu ma mamnuuci karaan awoodda kiraystuhu uu u leeyahay in uu qaabilo marti; laakiin, kiraytayaasha ayaa masuul ka ah habdhaqanka martidooda.
- Samaynta siyaasad martiyeed oo macquul ah isla markaana la fulin karo waxa ay noqon kartaa arrin adag.
- Siyaasad ku waajibinaysa kiraystaha in uu ku wargeliyo mulkiilaha dhammaan martida uu qaabilayo waxa ay caadi ahaan noqon doontaa mid aan la fulin karin.



SHURUUDAHA JOOJINTA HESHIISKA KIRADA

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Waxa ay tahay inaad joogtayso muddada wakhtiga ah ee ku xusan heshiiska kirada ee qoraalka ah.

Cawaaqibta guuritaanka kahor dhammaadka heshiiska kirada:

- Mulkiiluhu waxa uu ku saari karaa masuuliyadda dhaqaale ee kirada (iyo adeegyada guriyeed, haddii ay ahaayeen masuuliyadda kiraystaha) illaa la gaadho dhammaadka heshiiska kirada ama illaa mulkiiluhu uu helo kirayste cusub.
- Waxa sidoo kale lagu saari karaa masuuliyadda kahrashaadka la xidhiidha dib u kireynta guriga.
- Shardi heshiis kiro oo dhigaya in mulkiiluhu kaa saari karo guriga isaga oo aan marin hannaan maxkamadeed oo sharci ah waa mid aan la fulin karin.


TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Haddii aad doonayso kiraystuhu in uu guuro, waa inaad u dirto wargelin joojin - xattaa dhammaadka muddada heshiiska kiro.
- Iyada oo aanay jirin wargelin joojin oo dhab ah, ma bilaabi kartid talaabo maxkamadeed oo ka dhan ah dadka degan guriga - xattaa haddii heshiiskaaga kiro uu dhigayo in ay tahay inay guuraan dhammaadka muddada heshiiska kiro.
- Haddii kiraystaha gurigaagu uu guuro kahor dhammaadka muddada heshiiska kirada, waxa aad saari kartaa masuuliyadda bixinta kharashka kirada, adeegyada guriga (haddii heshiiska kiradu uu dhigayo in kiraystuhu uu bixinayo kharashkooda) iyo kharashaadka macquulka ah ee la xidhiidhka dib u kireynta guriga.

QAYBTA 3: ILAALLINADA SHARCIYEED

Xidhiidhka kiraynta waxa maamula shuruucda waxana ay khuseeyaan qofkasta oo ku sugan Vermont. Inta ugu badan, balse aan ahayn dhammaan, xuquuqda iyo masuuliyadaha Mulkiilayaasha iyo Kiraystayaasha waxa lagaga hadlaa [Cinwaanka 9 V.S.A. \(Sharciga Vermont ee La Sharxay\) Cutubka 137.](#)

Taasi kama dhigna in xaalad walba jawaab looga heli doono qaybtaas kamidka ah sharciga. Sharciga Guud, Sharciga Ka Saarista, Xaaladaha Faldembiyeed, Sharciga Guryeynta Cadaaladda ah iyo xattaa Sharciga Go'aminta "Case Law" waxa ay qayb ka yihiin kiraynta. Dhammaan jawaabuhu ma aha kuwo si fudud loo kala sooci karo. Waxa jira aagag badan oo shubuhaad ah iyo khuraafaad badan. Raadsashada caawimo xirfadeed ayaa badanaa ah tallaabada ugu wanaagsan.



SHARCIGA GURYEYNTA CADAALADDA AH

THE TIME IS ALWAYS RIGHT
TO DO WHAT IS RIGHT
MLK



WAA MAXAY GURYEYNTA CADAALADDA AH?

- Guryeyn Caddaalad ah waa xaq uu qof u leeyahay in uu doorto halka uu ku noolaanayo iyo xaq uu u leeyahay in uu guri kiraysto, iibsado, ama uu maalgashado guri isaga oo aan la kulmeyn takoor.
- Guryeyn Caddaalad ah waa xaq uu qof u leeyahay in uu fursad loo siman yahay u helo guryeynta.

QAAR KAMID AH ERAYBIXINADA BADANAA LA ADEEGSADO:

- **“Dabaqadda La Ilaaliyey”** – kooxaha dadka ah ee sharciga Guryeynta Cadaaladda ahi uu khuseeyo.
- **“Xaaladda Qoys”** – Joogitaanka carruur yaryar.
- **“Jihaynta”** – Jihaynta ama u ogolaansho la'aanta xubin kamid ah dabaqadda la ilaaliyey in uu galaangal u helo dhammaan kirooyinka la heli karo.
Tusaale - usoo jeedinta qof adeegsada tukubeyaal/gaadhi curyaan in dabaqa koowaad ee abaarmanku ay munaasab u noqon karto isaga marka loo eego dabaqa labaad ee uu codsaday inuu arko.
- **“Saameyn aan Caadi ahayn”** - Xeer dhexdhexaad ah oo saameyn weyn ku leh xubnaha ka tirsan dabaqadda la ilaaliyey.

TALOOYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Mulkiiluhu waxa uu xaq u leeyahay in uu sameeyo isla markaana fuliyo nidaamyo ganacsi oo sharci ah si uu u ilaaliyo oo uu u maareeyo guriga kirada ah, sida in uu dalbado tixraacyo ama uu ka diido in uu ka kireeyo guri dadka aan haysan dakhli ku filan in ay ku bixiyaan kharashka kirada. Laakiin, shuruudahan waa in si joogto ah loogu dabbago dhammaan dadka.
- Mulkiilayaashu waxa ay diidi karaan inay guri ka kireeyaan dadka leh taariikh ah habdhaqan la diidi karo kahor kirada, sida rabshidda kiraystayaasha kale, waxyeellaynta guriga, ama bixin la'aanta kharashka kirada.
- Mulkiilayaashu uma adeegsan karaan, laakiin, nidaamyo ganacsi oo sharci ah inay cudur daar uga dhigtaan takoor.
- Waa arrin sharciga kasoo horjeedda in mulkiiluhu weydiyo kirayste ama kirayste suuragal ah in uu leeyahay naafanimada. Laakiin, haddii kireyste naaf ahi codsado fudaydin macquul ah, mulkiiluhu waxa uu xaq u leeyahay in uu weydiyo caddeynta naafanimada iyo baahida uu u qabo fudaydinta uu codsaday, iyada oo naafanimadu tahay moojee mid iska muuqata. Mulkiiluhu ma weydiin karo waxa naafanimadu tahay.

13 KA DABAQADOOD EE LA ILAALIYAY

ILLAALINADA FEDERAALKA

Qowmiyad	Xaalad Qoys
Midabka	Naafanimada
Diinta Jinsiga	
Qaranka Qofku Kasoo Jeedo	

ILAALINNADA VERMONT EE DHEERAADKA AH

Da'da (18+)
Xaaladda Guur (xaas leh ama aan xaas lahayn)
Jihada Galmeed
Aqoonsiga Jinsiyeed
Helitaanka Kaalmo Dawladeed
Dhibbanayaasha xadgudubka, xadgudubka galmeed ama dabagurka



TAKOORKA GURYEYNTU WAA MIDKASTA OO KAMID AH HAWLAHA SOO SOCDA OO KU SALAYSAN XUBINIMADA DABAQAD LA ILAALIYEY:

- Diidmada in uu kireeyo, iibiyo, ama maalgeliyo guri.
- U dejinta shuruudo, xeerar, ama faa'iidoyin ka duwan kuwa dadka kale ama siinta adeegyo guriyeyn oo ka duwan kuwa dadka kale.
- In la sameeyo, la daabaco, ama la baahiyo wargelin, bayaan, ama xayeysiis muujinaya doorbiditaan, xaddidaad, ama takoor.
- In la sameeyo soo jeedin been ah oo la xidhiidha helitaanka iibka, baadhista, ama kirada.
- U diiditaanka qof in uu galaangal u helo adeeg ama xarun la xidhiidha iibka ama kirada guryaha (MLS, ururka dillaalada hantida maguurtada ah, iwm.).
- Ku qasbidda, cabsigelinta, handadaadda, ama faragelinta qof guryeynta ama xareynta ama taageeridda dacwad takoor. [Sharciga Vermont ee La Sharxay, Cinwaanka 9, Cutubka 139](#)

GURIGU MA KU JIRAA CAYMIS?

- Sharciga guryeynta cadaaladda ah waxa uu khuseeyaa guryaha deganaanshiyaha mana khuseeyo guryaha ganacsiyeed sida dukaanada tafaariiqda iyo xafiisyada. Guryaha ganacsiyeed waxa ay hoos yimaadaan sharciga fudaydinada dadweynaha.
- Qowmiyadda, midabka, iyo qaranka qofku kasoo jeedo waxa laga hadlaa dhammaan xaaladaha, xattaa haddii gurigu yahay mid laga reebay.
- Xayeysiiska iyo bayaanada dadweynuhu sidoo kale waa kuwo hoos yimaadda sharciga guryeynta cadaaladda ah.

Sharciga Vermont waxa uu ka bixiyaa **ka reebitaano aad u xaddidan** aagagga kale ee sharciga guryeynta cadaaladda ah. *Xattaa haddii gurigu yahay mid laga reebay, shuruudaha xayeysiiska iyo takoorka ku salaysan qowmiyadda, midabka, iyo qaranka qofku kasoo jeedo badanaaba waa kuwo ku jira caymiska.*

- Dhisme ka kooban saddex ama wax yar oo abaarmanno ah kuma jiraan caymiska, balse keliya haddii mulkiilaha ama xubin qoyska dhaw ee mulkiilaha ahi ay degan tahay midkamid ah abaarmannada ayaa laga hadlaa. (Magaalada Burlington, ka reebitaanku keliya waxa uu khuseeyaa dhismeyaasha ka kooban laba abaarman.)
- Diidmada in guri laga kireeyo kirayste suuragal ah oo ka yar da'da 18 waa arrin la aqbali karo.
- Doorbiditaanka diimeed ee la siiyo kiraystayaasha isku diinta ah sida ta ay bixiso jimciyadda diineed ee bixisa ama ka kireysa qolal samafal ahaan waa mid la aqbali karO.
- Guryaha kirada ee waayeelka ee takoorka ku sameeya qoysaska leh carruurta waa mid la aqbali karo haddii guriga ay keliya degan yihiin dad ka weyn da'da 62, ama haddii ugu yaraan hal qof oo ka weyn da'da 55 uu degan yahay guri walba isla markaana dhismuhu siiyo adeegyo laxaad leh ama fursado guri oo muhiim ah waayeelka.
- Kireynta guryaha aad ugu yaraan kara qoyska doonaya inay ku noolaadaan halkaas, iyada oo lagu salaynayo heerar deganaanshiyo oo la dabbaqayo, waa sharci darro.

TAKOORKA KU SALAYSAN XAALADDA QOYSEED

- Guriga looma diidi karo oo shuruuc ka duwan kuwa dadka kale looma dabbiqi karo joogitaanka carruur yaryar awgood.
- Qoysaska looma jihayn karo meel ka fog (ama ku wajahan) guryo gaar ah.
- Xeerarka waa in loogu dabbaqaa si joogto ah dhammaan kiraystayaasha oo aan la bartilmaameedsan qoysaska leh carruurta.
- Heerarka deganaanshiyaha macquulka ah waa la ogol yahay.

Maxaa loo tixgeliyaa heer deganaanshiyo macquul ah?

- Ka xeer guud ahaan, heerarka deganaanshiyaha ee ku xaddidaya kiraystayaasha laba qof qolkiiba ama aag hurdo loo ansixiyey (qolalka ku dhex yaalla guri ee loo adeegsado hurdadu waa inay u hoggaansan yihiin shuruudaha Ammaanka Dabka), ama raaca Xaddidaaha Deganaanshaha Dawladda Hoose ama ogolaanshaha guriga xaddidaya deganaanshaha ma aha kuwo jebinaya sharciga guryeynta.
- Xeerarka xaddidaya tirada carruurta ee gurigiiba halkii ay xaddidi lahaayeen tirada dad ah ee gurigiiba waa takoor.
- Dib u eegista kiisaska deganaanshiyaha, [HUD](#) iyo [Guddiga Xuquuqda Aadanaha Vermont](#) waxa ay tixgeliyaan xajmiga iyo tirada qolalka hurdada iyo duruufo gaar ah oo kale.



TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Waa go'aan u yaalla waalidiinta haddii ay doonayaan carruurta (oo ay kamid yihiin carruurta aan isku jinsiga ahayn) inay wadaagaan qol hurdo.
- Xeerarka la xidhiidha codka waa inay ka joojiyaan qofkasta inay codad sarreeya oo aan daruuri ahayn sameeyaan, oo aanu keliya carruurta ka joojin.
- Abuur xeerar khuseeya qofwalba.
- Bixi adeegyo ama faa'iidooyin khuseeya qofwalba oo ay kamid yihiin carruurta.
- U xayeysii ama u sharrax guriga sida uu yahay, halka aad ka sharxi lahayd cidda codsadhaha wanaagsan noqonayso.
- Iska ilaali weedhaha ay kamid yihiin: "U wanaagsan dadka kelida ah" ama "goob u wanaagsan lammaanaha" maadaama oo kuwan loo fasiran karo inaad isku dayeyso inaad reebto carruurta.

TAKOORKA KU SALAYSAN NAAFANIMADA

QEEXITAANKA NAAFANIMADA

Qof waxa loo tixgeliyaa in uu naafo yahay haddii wax kamid ah saddexdan shuruudood uu buuxiyo:

- Daciifnimo jidheed ama maskaxeed taas oo si laxaad leh u yareysa mid ama wax ka badan oo shaqooyinka nololeed ah.
- Qof ay dadka kale u tixgeiyaan in uu qabo daciifnimadaas.
- Diiwaan ah qabitaanka daciifnimo - Sida, qaadashada SSI, SSDI, iwm.

“Daciifnimo jidheed ama maskaxeed” waxa ay tilmaamaysaa *xaalad ama cudur saameeya maskaxda ama jidhka*.

"Kaas oo si laxaad leh u xaddida" waxa ay tilmaamaysaa *muddo badan oo wakhti ah ama xad aad u badan*.

"Mid ama wax ka badan oo shaqooyinka nololaha ah" waxa ay tilmaamaysaa *socodka, hadalka, neefsashada, araga, maqalka, is-daryeelka, bixinta biilasha, iwm.*

[-V.S.A. Cinwaanka 9, Cutubka 139](#)

DARYEELAHA QOFKA LA NOOL EE DADKA NAAFADA AH

- Qofka naafada ahi waxa uu xaq u leeyahay in uu codsado daryeelaha qofka la nool.
- Dakhliga iyo hantida daryeelaha qofka la nool lagu ma daro xisaabta tilmaamaha dakhliga ee kaalmada guryeynta dadweynaha.



WAX KA BEDDELADA MACQUULKA AH EE DEGANAYAASHA NAAFADA AH

WAA MAXAY WAX KA BEDDELKA MACQUULKA AH?

- Isbeddel muuqaaleed oo lagu sameeyo guri ama dhisme kiro ah kaas oo u sahla deganayaal naafo ah inay u adeegsadaan uguna raaxaystaan guriga sida qofka aan naafada ahayn oo kale.
- Wax ka beddelada lagu sameeyo guryaha ay kabto dawladdu waxa badanaa kharashkiisa bixiya mulkiilaha.
- Wax ka beddelada lagu sameeyo guryaha kirada ee gaarka loo leeyahay waxa kharashkooda bixiya qofka degaya.
- Deganaa waxa ku waajib noqon kara in uu guriga ku celiyo sidiisii hore marka uu ka guurayo haddii mulkiiluhu ka codsado.

TUSAALEYAAL AH WAX KA BEDDELADA MACQUULKA AH:


- Ballaadhinta albaabada si looga dhigo qolalka kuwo marin ballaadhan.
- Ku rakibaadda biro la qabsado musqulaha.
- Hoos u dhigidda khaanadaha madbakha iyada oo la gaadhsiiyayo joog munaasab ku ah qof gaadhi curyaan saaran.
- Ku rakibidda waddada gaadhi curyaanka bannaanka dhismaha.
- Dareemaha qiiqa iyo kaarboon mono ogsaydhka ee iftiinka bigdamta ah bixiya.

CODSIGA WAX KA BEDDEL MACQUULKA AH

Sida uu dhigayo Sharciga Guryeynta Cadaaladda ah, mulkiiluhu kuma waajibin karo kirayste in uu adeegsado foom gaar ah ama xattaa uu dalbado in codsigu noqdo qoraal. Laakiin, Kiraystayaasha Vermont waxa ay si weyn ugu talinayaan in dhammaan codsiyada lagu gudbiyo qoraal ahaan ujeedooyin caddeyn awgood. Kiraystayaashu waxa ay kaalmo codsiyada ah ku heli karaan iyaga oo la xidhiidhaya [Mashruuca Guryeynta Cadaaladda ah ee CVOEO](#) ama khayraad kale oo ku qoran halka dambe ee buuggan. Waxa sidoo kale ku jira [waraaqaha foomamka muunadda ah](#) qaybta "Agabka" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Codsii wax ka beddel ama fudaydin macquul ah ayaa af ahaan ama qoraal ahaan loo gudbin karaa waxana soo gudbin kara qofka naafada ah ama qof ka wakiil ah isaga.
- Waa inaad jawaab degdeg ah ka bixiso dhammaan codsiyada wax ka beddelada iyo fudaydinta macquulka.
- Waxa aad codsan kartaa in deganuhu sharraxaad macquul ah ka bixiyo wax ka beddelka uu soo jeedinayo.
- Waxa aad codsan kartaa in deganuhu in uu shaqada u qabto qaab xirfad leh.
- Waxa aad codsan kartaa in deganuhu xasiliyo dhammaan ogolaanshooyinka la dabbaqo kahor inta aan la bilaabin wax ka beddelka.
- Ha ka dalban deganaha in uu bixiyo debaaji dheeraad ah.
- Dalabyada wax ka beddelada iyo fudaydinta macquulka ah waa kuwo aad u xaddidan waxana ay u baahan karaan lafa-gurid kiis kiis ah.
- Codsiyada wax ka beddelka iyo fudaydinta macquulka ah waa inaad kala hadasho qareenkaaga haddii aanad hubin inay tahay inaad mid bixiso ama inaanay ahayn.



FUDAYDINADA MACQUULKA AH EE DEGANAYAASHA NAAFADA AH

WAA MAXAY FUDAYDIN MACQUUL AH?

Isbeddel lagu sameeyo xeer, siyaasad ama nidaam kaas oo u sahla deggane naafo ah in uu fursad loo siman yahay u helo in uu adeegsado oo uu ku raaxaysto guri deganaanshiyo.

MAXAY KA DHIGAN TAHAY "MACQUUL AH"?

- "Waxa uu u muuqdaa macquul muuqaalkiisu" ama haddii codsigu u muuqdo in uu yahay mid macquul ah ama la fulin karo.
- Haddii codsigu beddel aasaasi ah ku abuurto ganacsiga mulkiilaha ama culays dhaqaale oo aan loo baahneyn abuurto (Dhibaato aan Loo Baahneyn), codsiga waxa dhici karta inaan lagu qasbanaan in la bixiyo.

MAXAY KA DHIGAN TAHAY "DHIBAATO AAN LOO BAAHNEYN"?

- Codsigu waxa uu ku abuurto karaa culays ama kharash weyn mulkiilaha.
- Dhibaato aan loo baahneyn keliya ma tilmaamayso dhibaato dhaqaale, balse sidoo kale waxa ay tilmaamaysaa codsiyada baaxadda leh, laxaadka leh, ama kharibaadda leh ee aan loo baahneyn, ama kuwa si aasaasi ah wax uga beddeli kara nooca ama shaqada ganacsiga.

TUSAALEYAASHA FUDAYDINTA MACQUULKA AH

- Degane qaba daciifnimo jidheed ama maskaxeed ayaa codsanaya wax ka beddel in lagu sameeyo siyaasadda "Xayawaan carbis la'aanta" si uu u heli karo xayaan kaalmo oo ka caawiya yareynta naafanimadiisa (wax tababar ah oo gaar ah looma baahna).
- Degane qaba naafanimo socod ayaa codsanaya baarkin loo qoondeeyo ama in loo beddelo aag loo qoondeeyey oo hore u jirey oo ku dhaw albaabka laga soo galo, xattaa haddii gurigu aanu lahayn aagag baarkin oo la qoondeeyey.
- Degane leh daryeelaha qofka la nool ayaa codsanaya fure dheeraad ah si uu si sahlan ugu ogolaado in uu soo galo gurigiisa.
- Degane leh balwad uu imika kasoo kabanayo ayaa codsanaya fudaydin tilmaamaha codsiga ah in loo tixgeliyo iyada oo uu jiro diiwaan faldembiyeed oo uu ku yeeshay balwadiisa.

CODSIGA FUDAYDIN MACQUUL AH

Sida uu dhigayo Sharciga Guryeynta Cadaaladda ah, mulkiiluhu kuma waajibin karo kirayste in uu adeegsado foom gaar ah ama xattaa uu dalbado in codsigu noqdo qoraal. Laakiin, Kiraystayaasha Vermont waxa ay si weyn ugu talinayaan in dhammaan codsiyada lagu gudbiyo qoraal ahaan ujeedooyin caddeyn awgood. Kiraystayaashu waxa ay kaalmo codsiyada ah ku heli karaan iyaga oo la xidhiidhaya [Mashruuca Guryeynta Cadaaladda ee CVOEO](#) ama khayraadka kale ee ku qoran halka dambe ee buuggan. Waxa sidoo kale ku jira [waraaqaha foomamka ee muunadda ah](#) qaybta "Agabka" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.

TALOOYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Ka jawaab dhammaan codsiyada qaab wakhtiga munaasab ku ah.
- Su'aalaha **aanad** soo jeedin karin:
 - Waa maxay nooca naafanimada deganuhu uu leeyahay.
 - Su'aalaha u baahan kara in la sheego taariikhda caafimaad.
 - In qofku uu u noolaan karo si madax bannaan.
- Su'aalaha aad soo jeedin karto:
 - Xaqiijinta in degganuhu uu qabo naafanimo, balse keliya haddii aanay naafanimadu ahayn mid muuqata.
 - Wax ka beddelka ama fudaynta deganuhu uu dalbanayo.
 - Waxa uu yahay xidhiidhka ka dhexeeya naafanimada iyo wax ka bedelka fudaydinta gaarka ah.
- Waxa aad abuurto kartaa foom iyo hannaan aad kula tacaalayso codsiyada wax ka bedelka/fudaydinta, balse kuma waajibin kartid deganaha in uu adeegsado foomka si uu usoo gudbiyo codsi.

TALOOYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Qoraal ka qaado dhakhtarkaaga ama khabiir khibrad ah kaas oo xaqiijinaya in aad tahay qof naafo ah iyo inaad u dalbanayso fudaydinta ama wax ka bedelka naafanimada awgeed.
- Ku adeegso eraybixinada "Fudaydin Macquul ah" ama "Wax Ka Beddel" codsigaaga.
- Haddii mulkiiluhu diido in uu u hogaansamo codsigaaga, waxa aad la xidhiidhi kartaa [Mashruuca Guryeynta Cadaaladda ah](#) ama [khayraadka kale](#) ee ku qoran ku qoran halka dambe ee Buug-hagitaaneedkan si aad kaalmo uga hesho.

XAYEYSIINTA & SHARCIGA GURYEYNTA CADAALADDA AH

WAXA UU DHIGAYO SHARCIGA VERMONT:

"Waa arrin sharci darro ka ah qofkasta...in uu sameeyo, daabaco, ama baahiyo, ama uu sababo in la sameeyo, daabaco, ama la baahiyo wargelin, bayaan, ama xayeyiin, la xidhiidha iibka ama kiraynta guri ama hanti maguurto ah oo kale taas oo muujinaysa doorbiditaan, xaddidaad, ama takoor ku salaysan qowmiyad, galmo, jiho galmeed, aqoonsi jinsiyeed, da', xaalad guur, caqiido diimeed, midab, qaranka qofku kasoo jeedo, ama naafanimo qof, ama sabab la xidhiidha qof doonaya in uu dego guri oo uu wato mid ama wax ka badan oo carruur ah, ama sabab la xidhiidha qof qaata kaalmo dawladeed, ama sabab la xidhiidha qof dhibbane u ah xadgudub, xadgudub galmo, ama dabagur."

[9 V.S.A. Cutubka 139 §4503](#)

- Marka lasoo bandhigayo xayeyisiyada ama la diidayo codsi Kireeye ma adeegsan karo erayo ama weedho takoor ah.
- Tusaale ah Weedho Takoor ah:
 - Guri kiristan ah
 - Shakhsiyad qaangaadh ah
 - Ma aha mid naafadu geli karto
 - U wanaagsan qofka kelida ah
 - Lama ogola xayawaan carbis ah, ka reebitaano ma jiraan
 - Qaybta 8 lama ogola

SHURUUDDA BAADHISTA KIRAYSTAHA LA OGOL YAHAY:

- Muujinta awoodda bixinta kharashka kirada wakhtiga loogu talagalay.
- Tixraacyada shakhsiyeed iyo/ama Kireeyaha.
- Hubinta deynbixinta, oo ay kamid yihiin shuruudaha dhibcaha deynbixinta ugu yar.
- Taariikhda faldembiyeed
- Codsaduhu waxa uu codsan karaan fursad uu sharxo wixii duruufo taban ah.
- Codsi ah fudaydin macquul ah oo uu soo gudbiyo codsade ma noqon karto wax lagu saleeyo diidmo kiro.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Sharrax guriga, ha sharxin nooca kiraystaha ee aad raadinayso.
- Xusuusnow in aanad u diidi karin guri qof kamid ah dabaqadda la ilaaliyey iyada oo moojee ay jirto sabab kale, oo sharci ah sida taariikh deyn bixin oo liidata ama haddii gurigu uu hore u kiraysan yahay.
- Dib u eeg dhammaan xayeyisiyada ee dadka kale ay sameeyaan iyaga oo kaa wakiil ah - haddii deganaha haddii uu xayeyiinayo cid guriga la kireysato, mulkiilaha waxa la saari karaa masuuliyadda bayaanada takoorka ee la adeegsaday.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA AAMINSAN INAY WAJAHAYAAN TAKOOR

- Farqiga u dhexeeya **Takoorka** iyo **Takoorka Sharcidarrada ah**
 - In lagu diido kirada maadaama oo aad leedahay taatuu ama sanki iyo dhegaha dalooshatay ama aad leedahay taariikh faldembiyeed waxa ay noqon kartaa takoor, balse ma aha Takoor Sharcidarro ah waayo kuwan midna looma tixgeliyo inay yihiin "dabaqad ilaashan."
 - In lagu diido kirada adiga maadaama oo aad leedahay deyn bixin xun ama tixraacyo liita, xattaa haddii aad naaftahay, looma tixgeliyo inay tahay Takoor Sharcidarro ah.
 - Dejinta xeerar ama siyaasado ka duwan kuwa dadka habdhaqankaaga awgii looma tixgeliyo takoor illaa inta habdhaqankaasi uu sabab u yahay naafanimadaada ama uu la xidhiidho ahaanshahaaga xubin kamid ah dabaqadda la ilaaliyey.

AARGOOSIGA SHARCIDARRADA

WAXA UU DHIGAYO SHARCIGA VERMONT:

Waa arrin sharci darro ku ah mulkiilaha in uu ka aargoosto kirayste dalbaday wax ka beddel ama fudaydin macquul ah ama ka cawday xadgudubyo lagu la kacay xuquuqdooda hoos timaadda sharciga Guryeynta Cadaaladda ah.

Taas marka laga yimaaddo, mulkiile guri deganaanshiyo kuma aargoosan karo sameynta ama bedelidda shuruudaha heshiiska kirada, kordhinta kirada ama ka qaadista ama ku handaadaadda tallaabo ka dhan ah kirayste:

- Uu uga cawday hay'ad dawladeed oo masuul ka ah fulinta sharciga dhisme, guri, ama caafimaad xadgudub loo geystay dhismayaasha taas oo si weyn u saameynaysa caafimaadka iyo ammaanka;
- Uu uga cawday kireeye xadgudub loo geystay Heshiisyada Kirada Guriyeed ee Vermont ama Sharciga Guryeynta Cadaalada ah; ama
- Uu qabanqaabiyey ama uu xubin ka noqday midawga kiraystaha ama hay'ad lamid ah.

Haddii kireeye uu sameeyo fal xadgudub ku ah qaybtan, kiraystuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu soo ceshado kharashka waxyeellooyinka iyo kharashka qareenka ee macquulka ah waxana uu ka ilaashan yahay tallaabo aargoosi oo kasta oo haysashada ah.

Haddii kireeye uu bixiyo wargelin heshiis kiro isaga oo ku salaynaya sabab aan ahayn bixin la'aanta kharashka kirada muddo 90 maalmood ah guddahood kadib wargelinta ay bixiso hay'ad dawlad hoose ama Gobol oo ah in dhismuhu aanu u hogaansaneyn sharciyada caafimaadka iyo ammaanka ee la dabbabo, waxa jirta qiyaasasho la burin karo oo ah in wixii joojin ah ee uu sameeyo mulkiiluhu ay tahay aargoosasho ku timid in kiraystuhu uu soo sheegay hogaansan la'aanta. (Maxkamaddu waxa ay qiyaasi doontaa in ka saaristu ay tahay aargoosasho balse mulkiiluhu waxa uu isku dayi karaa in uu caddeeyo in ay ka saaristu ku timid sababo kale, oo sharci ah.)

[9 V.S.A. Cutubka 137 §4465](#)

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Haddii kiraystuhu uu soo gudbiyo cabasho ku saabsan xaaladda kirada, waxa aad baadhis ku sameysaa guriga oo waxa aad samaysaa dayactirada daruuriga ah. Ha dhayalsan cabashooyinka deganahaaga.
- Ha siin kiraystaha gurigaaga wargelin joojin waxyar kadib kiraystuhu marka uu kuu soo gudbiyo cabasho. Haddii kiraystuhu uu sifo sharci ah kaaga haysto kharashka kirada, waxa aad raadsataa talo sharciyeed.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Dhammaan noocyada aargoosiga looma tixgeliyo inay yihiin sharcidarro.
- Sida uu dhigayo sharciga Vermont, mulkiilayaasha waajib kuma aha in ay kirooyin isku mid ah ka qaadaan guryaha isku midka ah (marka laga reebo Beeraha Guryaha Guurguura "Mobile Home Parks").
- "Kireeye" ma aha xirfad nidaamsan; ma xidhaan shuruuc qarsoodinimo ama akhlaaqeed.
- Haddii aad ka walaacsan tahay in sifo sharci darro ah lagaaga aargoostay, waxa aad la xidhiidhaa [Kiraystayaasha Vermont](#) si aad uga hesho faahfaahin iyo caawimo xaaladda ah.

XUQUUQDA GALAANGAL U HELIDDA IYO QARSOODINIMADA

HALKAN WAXA AH SIDA MULKIILE UU GALAANGAL UGU HELI KARO GURI KIRAYSTE ISAGA OO IXTIRAAMAYA XAQIISA QARSOODINIMADA :

SIDEE

- Waxa ay ku xidhan tahay ogolaanshaha kiraystaha, taas oo aan si aan macquul ahayn loo diidi karin.
- Kadib marka la siiyo kiraystaha ugu yaraan wargelin soo gelitaan oo 48 saac doood ah inta u dhaxaysa 9 g.h. and 9 g.d.
- Xaalad degdeg ah.

SABAB

- Si loo baadho dhismaha
- Si loo sameeyo wax ka beddelo ama dayactiro.
- Si loo bixiyo adeegyo lagu heshiiyey.
- Si loo tuso guriga kiraystayaasha ama iibsadeyaasha macquulka ah.
- Si looga hortago wixii dhaawac ah ee ku imaada xaalad degdeg ah.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Gelitaanka guriga kiraystaha iyada oo aan la raaceyn sharciga waa "Gelitaan Sharcidarro ah," waana xadgudub faldembiyeed.
- Wargelinta la siiyo kiraystaha ee gelitaanku qasab ma aha inay noqoto qoraal (waa lagu taliyaa, balse waajib ma aha). Wicitaan taleefan, fariin qoraal, ama xusuusin lagaga tago albaabka ayaa ku filan.
- Haddii aad bixiso wargelin munaasab ah, waad geli kartaa guriga xattaa haddii kiraystuhu aanu guriga joogin.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Kiraystayaashu "sabab la'aan" uma diidi karaan inay mulkiilaha ogolaansho u siiyaan in uu soo galo.
- Haddii mulkiiluhu uu soo galayo gurigaaga wargelin la'aan waxa aad bilawdaa inaad u sheegto sharciga. Waxa ku jirta [waraaq foom ah](#) oo loogu talagalay ujeedkan qaybta "Agabka" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.
- Haddii mulkiiluhu uu sii wado in uu soo galo, waxa aad wici kartaa bilayska.
- Xaaladaha xad dhaafka ah, waa suuragal inaad Wargelin Gelitaan kasoo saarto mulkiilaha. Waxa aad wacdaa [Kiraystayaasha Vermont](#) si aad uga hesho kaalmo kahor inta aanad isku deyin tan.



KORDHINTA KIRADA

Kordhinta kharashka kiradu waa inay dhaqangal noqotaa maalinta koowaad ee muddada kirada kadib wargelin qoraal ah oo aan ka yareyn 60 maalmood oo la siiyo kiraystaha.

Tusaale:

- Kirayste ayaa bixiya kharashkiisa kirada maalinnta koowaad ee bil walba. Koowaad illaa koowaad waa Muddada Kirada.
- Mulkiiluhu waxa uu siinayaa kiraystaha wargelin qoraal ah oo sheegaysa kordhinta Juun 10keeda. Muddo aan ka yareyn laba "Muddo Kordhin oo Buuxa" waxa ay ka dhigan tahay kordhintu waxa ay dhaqan galaysaa Sibtembar 1deeda.
- Wargelintu ma noqon karto muddo ka yar 60 maalmood haddii kiraystuhu uu bixiyo kharashka toddobaad walba ama laba jeer toddobaadkii.
- Sharciyada magaalada Burlington waxa ay waajibiyaan muddo wargelin oo 90-maalmood ah.
- Xad ma laha inta kordhintu noqon karto iyada oo xaddiga lagu sheego heshiiska kirada moojee.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Kordhinta kiradu caadi ahaan ma dhici karto inta lagu gudo jiro muddo kiro, markaas waxaad u baahan kartaa inaad xilli hore sii qorshayso.
- Kiraystuhu kuma qasbana in uu ogolaado kordhinta kirada. Illaa inta lagu siiyey wargelin habboon oo qoraal ah oo kordhinta ah, waa dhaqangal.
- Ladhka heshiiska kirada, halkaas oo kiraystayaashu saxeexaan, ayaa lagu taliyaa kordhinada muddada heshiiska kirada iyo kordhinta kharashka kirada si qofwaliba u fahmo shuruudaha.

TALOOPYIN LOOGU TALAGALAY KIRAYSTAYAASHA S

- Haddii mulkiiluhu aanu ku siin wargelin qoraal ah ama muddo wargelin oo kugu filan, waxa aad kaga jawaabtaa qoraal ahaan. Waxa ku jirta [waraaq foom ah](#) oo loogu talagalay ujeedkan qaybta "Agabka" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.
- Dhererka muddada wargelinta waxa loo qorsheeyey kiraystaha si uu u bixiyo wargelin habboon oo ah in uu doonayo in uu guuro halkii uu ka bixin lahaa kordhinta.

QAYBTA 4: XEERARKA GURYEYNTA

DAMAANADDA AMMAAN AHAANSHAHA GURIGA

Xaqa guri ammaan ah waxa uu si xooggan salka ugu hayaa qaybta sharciga Vermont ee loo yaqaan [Damaanadda Ammaan Ahaanshaha Guriga](#). Damaanaddu waxa ay ku waajibinaysaa mulkiilaha in uu bixiyo oo uu joogteeyo dhismayaal ammaan ah, nadiif ah oo ku habboon degitaanka aadanaha isla markaana u hoggaansan xeerarka guryeynta ee la dabbaqo. Mushkilad kasta oo saamaysa caafimaadka iyo ammaanka guriga kirada ah guud ahaan waxa ay jebinaysaa damaanaddan.

Damaanadda ammaan ahaanshaha guriga waxa lagu sheegaa heshiiska u dhexeeya mulkiilaha iyo kiraystaha, af ahaan ama qoraal ahaan, ilaalinta hoos timaadda ilaalintana loogu ma diidi karo kiraystaha heshiis qoraal ah ama af ah. Haddii kiraystuhu ka war qabay ama haddii aanu ka warqabinba cillad jirtay marka uu usoo guurayo abaarmanka, waa masuuliyad saaran mulkiilaha in uu xalliyo mushkiladda.

Haddii aan si fudud u dhigo, tani waxa ay ka dhigan tahay in heshiiska kirada ee qoraalka ah aan loo adeegsan karin in masuuliyadda dayactiradda lagu saaro kiraystaha isla markaana dhammaan kirooyinka deganaanshiyahana ay tahay inay u hoggaansamaan Xeerarka Caafimaadka iyo Ammaanka.

XEERARKA KHUSEEYA:

- Xeerka Caafimaadka Guriga Kirada ah
- Xeerka Ammaanka Dabka Vermont
- Sharciyada Biyaha Bulaacadaha/ Biyaha Qasabadaha
- Sharciyada Maxalliga ah

MASUULIYADO GUUD


MULKIILAYAASHA

Mulkiile kama kireyn karo cidkale in uu dego guri, guri degitaan, guri qol-qol loo kireeyo, dhisme qol-qol iyo guri-guri loo kireeyo ama dhul loogu talagalay guryaha guurguura oo aan u hogaansaneyn shuruudaha xeerkan. Waa masuuliyad saaran mulkiilaha in uu ku ilaaliyo dhammaan dhismayaasha si waafaqsan xeerkan.

Maxkamadda Sare ee Vermont waxa ay go'aamisay in kireeyayaashu jebiyeen sharciga Ilaalinta Macmiilka ([9 V.S.A., Cutubka 63](#)) haddii ay si kas ah u kireeyaan guri aan hoggaansaneyn xeerka.

KIRAYSTAYAASHA

Kiraystuhu ma abuuri karo qaybna kama noqon karo hoggaansan la'aanta guriga degitaanka ee xukunada la dabbaqo ee kamid ah sharciyada dhismaha, guryeynta, iyo caafimaadka. [V.S.A. 9, 4456\(a\)](#)



SHURUUDAHA U HOGAANSANKA

ADEEGYADA MADBAKHA:

- Boos lagu keydiyo, diyaariyo oo lagu bixiyo cuntada.
- Xawdka madbakha.
- Miisas iyo sagxad aan biyaha nuugeyn.

XARUMAHA MUSQUSHA:

- Suuliga.
- Xawdka.
- Barkadda ama tuushka.
- Sagxad aan nuugeyn biyaha.
- Marawaxad ama daaqad hawo wareejin.

BIYAHA QASABADDA/SAARISTA BIYAHA BULAACADDA:

- Biyo qabaw iyo kuwo kulul oo baahida ku filan.
- Heerkulka biyaha kulul oo u dhexeeya 100°F iyo 120°F.
- Biyo nadiif ah oo ammaan u ah cabitaanka.
- Nidaamka bulaacadda oo u shaqaynaya si habboon.
- Biyo gelinta oo nidaam shaqo oo wanaagsan ku sugan.

XAALADAHA QASHINKA, XASHIISHKA IYO NADAAFADDA:

- Weel adag, oo la nadiifin karo oo loogu talagalay qashinka, waxyaabaha dib loo farsameyn karo iyo hadhaaga cuntada oo uu bixiyo kireeyuhu. Weelka qashinka iyo hadhaaga cuntada waa in ay noqdaan kuwo aanay biyuhu galeyn oo leh furar si wanaagsan u le'eg.
- Nadiifinta aagagga caamka ah oo uu bixiyo kireeyuhu.
- Haddii kireyste uu bixiyo kharashka qaadista qashinka kireeyuhu waa in uu hubiyo in qashinka dhab ahaan loo qaado toddobaad walba.
- Haddii dhismuhu ku yaallo Burlington isla markaana uu ka kooban yahay wax ka badan hal guri, kireeyuhu waa in uu bixiyaa kharashka qaadista qashinka.

KULEYLKA:

- Adeegyada kuleylinta oo ku sugan xaalad shaqo oo wanaagsan oo la baadhay 2 dii sano ee lasoo dhaafay (gurigu waa in uu lahaadaa calaamad hadda ah).
- Adeeyo kulaylin oo si habboon bannaanka hawada ugu saaraya.
- Adeeyo kuleylin oo awood u leh inay ku ilaaliyaan dhammaan qolalka heerkulka sareeya 65°F iyada oo aanay xadka kuleylka dhaafineyn qolka qalabka keydintu yaallo.
- Haddii kireeyuhu bixiyo kharashka kuleylinta, waa inay diyaar ahaataa wakhti kasta oo kamid ah sanadka oo heerkulka bannaanku ka hooseeyo 55°F.

HAWO WAREEGA DABIICIGA AH IYO TA MASHIINADA LOO ADEEGSADO:

- Qol kasta oo la degi karo waxa uu leeyahay ugu yaraan hal daaqad ama albaab, oo ku sugan xaalad shaqo oo wanaagsan oo loo furi karo hawo nadiif ah.
- Cadceed-celiyeyaasha daaqada waa la bixiyey waxana ay ku sugan yihiin xaalad wanaagsan.
- Dhammaan daaradaha iyo jaranjarooyinka ku yaalla aagagga caamka ah waxa loo sameeyey hawo wareejin habboon.
- Marawaxadda musqusha, hawo mareenka, ama hawo wareejintu waxa ay si toos ah ugu saarayaan bannaanka.
- Dhar qallajiyuhu waxa uu si toos ah hawada ugu saaraya bannaanka.

LAAMBADAHA IYO KORONTADA:

- Qol kasta oo la degi karo, marka laga reebo madbakha, waxa uu leeyahay laba fiish oo shaqaynayo ama hal fiish iyo hal laambad iftiin.
- Madbakhu waxa uu leeyahay ugu yaraan laba fiish oo shaqaynaya iyo hal laambad iftiin.
- Fiishashka khayraadka biyaha ugu dhaw ee nooca GFCL.
- Dhismaha iyo aagagga caamka ah ee dhismaha si habboon ayaa laambado loogu xidhay.
- Dhammaan nidaamyada korontadu waxa ay ku sugan yihiin xaalad wanaagsan.
- Shaqada koronto waxa qabtay xirfadle koronto oo liisan haysta.

CAYAYAANKA IYO JIRKA: YAA MASUUL KA AH?

MASUULIYADDA MULKIILAHA

- Aagagga caamka ah ee ka madhan faafitaanka xayawaanka (oo ay kamid yihiin cayayaanka).
- Dhismaha qaabdhismeed ahaan badqaba si aanay xayawaanku usoo geli karin.
- Ku faafitaanka wax ka badan hal guri.

Haddii cayayaan-dile uu go'aamiyo meesha cayayaanku ka bilawday, kiraystaha waxa la saari karaa masuuliyad dhaqaale.


MASUULIYADDA KIRAYSTAHA

- Ku faafitaanka keliya gurigiisa.
- Ku faafitaanka guri hal qoys ah (iyada oo moojee uu hore uga sii jirey wakhtigii soo guuritaanka).

ERAY KU SAABSAN TUKHAANKA

Tukhaanku waa cayayaan yaryar oo quuta dhiigga aadanaha. Badanaaba waxa ay firfircoon yihiin habeenkii marka dadku hurdaan. Tukhaanku wax baa ay qaniinaan - balse ma gudbiyaan cudurrada. Tukhaanku si bilaa xanuun ah ayaa ay u quutaan cidda ay dhiigga ka nuugayaan, iyaga oo ku muda xaddi yar oo dhareer ah inta ay hawsha ku jiraan, taas oo keenta xasaasiyad u dhaxaysa mid khafiif ah illaa mid daran. **Maadaama oo aanay sidin cuduro faafa, ugu ma jiraan sharciga Vermon inay yihiin sabab lagu diido kirada.**

Cayayaanku waxa ay noqdeen kuwo si ballaadhan usoo caanbaxa laga soo bilaabo markii la mamnuucay cayayaan dileyaashii halista ahaa sida DDT. Ma aha wax ka dhasha nadaafad xumo ama guri hagaajin liidata. Waxa ay ku dhici karaan qofkasta, meelkasta oo uu joogo. Waxa weeyi laakiin, xadugud Xeerka Caafimaadka Guryeynta Kirada ah si lamid ah sida cayayaanka kale. Kireeyeyaashu waxa ay masuuliyad sharciyeed ka saaran tahay inaanay keenin guriga kirada sidoo kalena waxa ay masuuliyadka saaran tahay inay ka qaybqaataan hannaanka baadhista. Keliya cayayaan dilistu ma xallin doonto faafitaanka, waxa jira tallaabooyin badan oo loo baahan yahay si tukhaanka looga tirtiro guri kuwaas oo u baahanaya inkahashi uu sameeyo kiraystuhu.



MASUULIYADHA KIRAYSTAHA INTA LAGU GUDO JIRO BUUFINTA TUKHAANKA

Waxa aad raacdaa dhammaan tilmaamaha ay ku siiso Shirkadda Buufinta Cayayaanka ee uu qandaraaska u siiyey mulkiiluhu inay shaqada qabato. Tan waxa ku jiri doona hawlaha ay kamid yihiin:

- Nadiifinta iyo nidaaminta aagga nololeed.
- Yareynta is dhexdaadsanaanta.
- Kiish ku ridista iyo qaadista furaashyada iyo maryaha.
- Adeegsiga qallajiye KULUL muddo 30 daqiiqo ah si aad ugu buufiso qalabka ciyaarta, kabaha, koodhadhka daahyada, shandadaha dhabarka, iwm.
- Gooni u saarista walxaha nadiifta ah illaa tukhaanka laga takhaluso.
- Ka fekeridda helitaanka galal furaash iyo barkimo.
- Ku xoqista lakabyada furaashyada burush adag.
- Huufar ku nadiifinta furaashyada, looxaanta sariirta, fadhiga, iyo kaarbadyada - gaar ahaan agagaarka meelaha la dhigo sariirta iyo fadhiga.
- Ku riditaanka kiishka huufarka kiish balaastig ah oo dahaadhan si dhakhso ah kadib huufar gareynta.
- Ku ridista kiishka dahaadhan weel bannaanka yaalla.
- Nadiifinta go'yaasha, daahyada, roogagga, kaarbadyada, iyo dharka.
- Ku maydhista iyo ku qallajinta furaashyada iyo dharka heerarka ugu kulul ee kulaylka.

Ma aha daruuri in bannaanka loo tuuro fadhiga iyo furaashyada. Waa in loola tacaalo iyaga oo qayb ka ah shaqada buufinta cayayaanka.

ISKA ILAALINTA YEELASHADA AMA FAAFINTA TUKHAANKA

- Baadhista alaabta kahor socdaalka.
- Ku maydhista dharka lagu tabarucay heerkulka ugu kulul kahor xidhashada.
- Qaadis la'aanta waxyaabaha la iska tuuray ee yaalla waddooyinka.
- Baadhista wixii fadhi la adeegsaday ah ama waxyaabaha lasoo iibsaday ee kale.
- Ku duubista walxaha cayayaanku ku faafay balaastig kahor tuuristooda.
- Jarjaridda walxaha cayayaanku ku faafay si looga hortago dib u adeegsiga.
- Ku calaamadinta walxaha la tuuray "ku faafay tukhaan" si looga hortago dib u adeegsiga.

NIDAAMYADA UGU WANAAGSAN EE KIRAYSTAYAASHA

- Waxa lagu saari karaa masuuliyadda dhaqaale ee sababidda faafitaanka cayayaanka.
- Ha qaadan fadhi bilaash ah ama walxo dhar ah oo la dhigay waddada dhinaceeda.
- Haddii aad socdaasho, waxa aad hubisaa halka aad ku dagayso marka aad gaadho waxana aad u hubisaa shandadahaaga si taxadar leh kahor inta aanad noqon.
- Waxa aad ka iibsataa shayada la adeegsaday keliya iibiyayaasha "hore usoo buufiya" kahor iibinta.
- Waxa aad si dhakhso ah ugu soo sheegtaa mulkiilaha wixii tukhaan ama cayayaan kale ama jir ah.
- Haddii mulkiiluhu aanu wax ka qaban mushkiladda, waxa aad si dhakhso ah ula xidhiidhaa Masuulka Caafimaadka Magaalada ama Xafiisyada Fulinta Xeerka Magaalada.

NIDAAMYADA UGU WANAAGSAN EE MULKIILAYAASHA

Mulkiilayaasha waxa ay masuuliyad ka saaran tahay inay si dhakhso ah uga jawaabaan marka lagu wargeliyo faafitaan, ay kamid yihiin tukhaan, isla markaana hubiyaan in la qaaday habraacyada buufinta cayayaanka ee saxda ah.

- Waxa aad adeegsataa hannaan is dhamaystiraya marka aad la tacaalayso arrimaha cayayaanka, oo ay kamid yihiin kuwo kiimiko ah iyo kuwo aan kiimiko ahayn sida ku dilista kulaylka iyo tirtirista khayraadka cuntada.
- Waxa aad adeegsataa rusheeye cayayaan dile ganacsiyeed oo xirfadle ah, oo shahaado haysta. Inaad adigu gurigaaga buufisaa keliya waxa ay mushkiladda ku faafisaa guryaha kale.

QAYBAHA QAABDHISMEED

Qaybaha qaabdhismeed waa in lagu ilaaliyaa qaab ama xaalad shaqo oo wanaagsan. Waa inay noqdaan kuwo u adkaysta cimilada, oo aanay soo gelin biyaha iyo jirku.

Guriga waa in sidoo kale lagu ilaaliyo in uu ka madhnaado biyo fadhiisinka joogtada ah ama mar-marka ah ama qoyaanka xad dhaafka ah ee keeni kara sameysanka caaryada ee muuqda.

Haddii ay jirto caaryo, qoyaanka oo ah isha ay ka timid caaryada waa in wax laga qabto isla markaana caaryada la nadiifiyo, ama meesha laga qaado qalabka dhismaha ee qoyan.

Baadhista caaryadu ma aha daruuri ama wax lagu taliyo. Ma jiraan wax heerar federaal ama gobol ah oo natiijooyinka baadhistaas la barbardhigi karo, sidaas darteedna natiijooyinka looma adeegsan karo in lagu sheego in dhismuhu yahay "ammaan" ama "ammaandarro." Caadi ahaan, baadhistu ma bixiso wax macluumaad ah oo wax ka beddeli kara tallaabooyinka ficilka lagu xallinayo mushkiladda.

- Seeska
- Jaranjarooyinka
- Sagxadaha
- Gidaarrada
- Siliigga
- Tuumbooyinka
- Albaabada
- Daaqadaha
- Saqafka

ADAAGYADA GURIYEED

Xeerka Caafimaadku waxa uu ka mamnuucayaa mulkiilayaasha inay damiyaan adeegyada guriyeed ee loo baahan yahay, "marka laga reebo hakinta ku meel gaadhka ah ee loo baahan karo marka la samaynayo dayactirrada ama wax ka beddelada dhabta ah ama inta lagu gudo jiro xaaladaha degdegga ah ee ku meelgaadhka ah."

Tani waxa ay khusaysaa adeegyada guriyeed ee aasaasiga ah sida shidaalka, korontada, iyo biyaha. Ma khusayso adeegyada guriyeed ee aan daruuriga ahayn.

AMMAANKA DABKA

Dhammaan rakibaadaha dareemayaasha qiiga iyo kaarboon mono ogsaydhka waa inay waafaqsanaadaan Xeerka Ammaanka Dabka & Dhismaha, ee ay hayso Waaxda Ammaanka Dabku.

MASUULIYADAH A MULKIILAH A

- Dareemayaasha Qiiga iyo Kaarboon Mono Ogsaydhka.
- Si joogto ah ugu xidhan nidaam koronto, oo leh baytari kayd ah, isla markaana si habboon u shaqaynaya.
- Ugu yaraan hal dareeme qiig iyo kaarboon mono ogsaydh (CO) oo ku xidhan dhammaan dabaqyada iyo afaafka aagagga hurdada hurtooda uun.
- Laga soo bilaabo 11/1/2015, dhammaan qolalka hurdadu waa inay yeeshaan dareemayaal qiig oo koronto ku shaqaynaya isla markaana leh baytari kayd ah.
- Haddii qalabka kulaylantu uu yaallo dabaqa hoose, markaas dareemayaasha qiiga iyo CO waa in lagu ag rakibaa halka ay ku dhamaato jaranjarta dabaqa hoose.
- Dhammaan dareemayaasha qiiga ee dhawaan la rakibay waa inay noqdaan nooca photoelectric ga ah.
- Kiraystayaasha ayaa looga baahan yahay ee mulkiilayaasha looga ma baahna inay baytariyada geliyaan dareemayaasha, balse mulkiilaha guriga ayey dantu ugu jirtaa in uu hubiyo inay si habboon u shaqaynayaan.

TAAS MARKA LAGA YIMAADD O:

- Dab damiyaha hadda ee uu bixiyey mulkiiluhu.
- Kadinada oo ay kamid yihiin albaabada iyo daaqadaha aagagga hurdada, waa inay noqdaan kuwo badqaba qaabdhismeed ahaan isla markaana ka madhan wax carqalado ah.
- Ugu yaraan hal daaqad oo ku taal dhammaan hurdooyinka iyo qolalka loo adeegsado aagag hurdo ahaan waa inay yihiin kuwo xajmi ahaan ku filan in laga bixi karo.
- Ma jiraan daakhiliyo hoosta laga xidhi karo oo albaabada dibaddu leeyihiin.
- Nidaamyada korontada ee u hogaansan xeerarka.
- Ka shaqaynta nidaamyada korontada iyo kulaylinta waxa keliya sameeya farsamayaqaan liisan haysta.
- Wax walxo guban kara ama waxyeello leh lagu ma keydin karo guri ama meel u dhaw ilaha kulaylinta.
- Jaranjarooyinka la wadaago waa inay noqdaan kuwo dabka iska caabin kara waana in aan loo adeegsan in la dhigo agab guban kara.



MASUULIYADAH A KIRAYSTAH A

- Ha dhigitn fadhiga marada ah barandeyaasha.
- Agabka shiilista waxa aad dhigtaa meel masafo aamin ah u jirta dhismayaasha.
- Si joogto ah u tijaabi oo baystariyada uga beddel baadheyaasha Qiiga iyo CO ga si joogto ah.
Baytariyada waa in laga beddelo laba jeer sanadkii. Inaad beddesho marka aad saacaddaada buuxinayso ee aad qadimayso ama dib u celinayso waa qaab wanaagsan oo aad ku xusuusan karto.
- Marnaba korontada ha ka saarin dareeme qiig ama CO.
- Ha dhigin walxo guban kara ama halis ah gurigaaga.
- Si dhakhso ah usoo sheeg wixii mashaakil koronto ah ee aad ka shakido.

RINJIGA LIIDHKA LEH

SUMOWGA LIIDHKA

Sumowga liidhku waa mushkilad caafimaad halis ah balse laga hortagi karo. Ma jirto wax heer ammaan ah oo ah liidhka ku jira jidhka ah. Liidhku waxa uu waxyeelleyn karaa qofkasta, balse dhallaanka, carruurta yaryar iyo dumarka uurka leh ayaa si gaar ah halis ugu sii jira. Ilmaha qaba sumowga liidhku badanaa uma muuqdo ama uma dhaqmo si qof xanuunsan, balse liidhku waxa uu sababi karaa mashaakil caafimaad oo halis ah. Waxyeellada uu geysto liidhku waxa dhici karta inaanay daaweysmin. Liidh aad u badan oo ku jira jidhka, ama ku sumowga liidhka, carruurta waxa ay waxyeelleyn kartaa maskaxda, kelyaha iyo nidaamka neerfaha, waxa ay yareyn kartaa korniinka iyo koboca, waxa ay adkeeyaan waxbarashada, waxa ay waxyeelleeyaan dhegaysiga iyo hadalka, waxana ay sababaan mashaakil habdhaqan. Dadka waaweyn waxa ay sidoo kale wajahaan saameynta caafimaad ee taban ee ka timaad liidhka. Dumarka uurka leh, liidhku waxa uu kordhin karaa halista dhicinta waxana uu ku sababi karaa carruurta inay ka hor dhashaan sidkooda, iyaga oo aad u yar dhashaan, ama ku dhashaan mashaakil waxbarasho ama habdhaqan. Dadka waaweyn, liidhku waxa uu ku sababi karaa dhiigkar oo uu ku keeni karaa hoos u dhac dhalmo ragga.

LIIDHKA GURYEYNTA

Ranjiga iyo dhaska liidhka ee ka yimaadda ranjiga liidhka waa ilaha waaweyn ee u baylihidda liidhka ee carruurta. Carruurta iyo dadka waaweyn waxa ay u baylihi karaan liidhka inta lagu gudo jiro mashaariicda dib u cusboonaysiinta ama markasta oo ranjiga liidhka si aan habbooneyn loo simo, xoqo, ama loo gubo.

Carruurta waxa ay sidoo kale u baylihi karaan haddii oogooyinka ranjiga aan la joogteyn wakhti kadib. Ranjigu waa uu burburaa waxana uu isku beddelaa dhas isaga oo wasakhaynaya guryaha iyo ciidda. Dhaskan ama ciiddan waxa ay ku dhegtaa qalabka ciyaarta, gacmaha iyo walxaha ay carruurta caadi ahaan ay geliyaan afkooda, taas oo u baylihisa liidh. Carruurta waxa ay sidoo kale u baylihi karaan liidhka iyaga oo cunaya, callalinaya ama jaqaya walxo liidh leh sida kaabadaha daaqadaha ama fadhiga.

SHARCIGA LIIDHKA EE VERMONT DHAQANADA BAADHISTA, DAYACTIRKA, IYO NADIIFINTA

Sharciga Liidhka ee Vermont waxa la ansixiyey 1996 waxana markii u dambeysay la muraajeecay 2017 (18 VSA Cutubka 38). Sharcigu waxa uu ku waajibinayaa kireeyayaasha leh dhimayaasha qadiimiga ah iyo xarumaha daryeelka ilmaha inay gacan ka geystaan ka hortagga carruurta inay u baylahaan liidh - kuwan waxa loo yaqaan Dhaqannada Baadhista, Dayactirka iyo Nadiifinta (IRC) (waxa laga soo bedelay "Dhaqanada Dayactirka Aasaasiga ah (EMP)" laga bilaabo Okt, 1, 2022). Haddii guri kiro deganaansho ama xarun daryeel ilmo la dhisay kahor 1978 kii, mulkiilaha guriga ama shirkadda maareynta guryaha waxa ku waajib ah inay u hogaansanto Sharciga Liidhka Vermont. Waa inay:

- Siiyaan kiraystayaasha buug-yare la ansixiyey oo ku saabsan kahortagga sumowga liidhka.
- Baahiyaan wargelin la ansixiyey oo ay kaga dalbanayaan dadka inay soo sheegaan ranjiga jeexjeexmay ama waxyeelloobay. Waxa aad ka eegtaa [wargelin muunad ah](#) qaybta Agabka.
- Waxa aad sanad walba sameysaa dhaqannada Baadhista, Dayactirrada iyo Nadiifinta, oo ay kamid yihiin:
 - Baadhista guriga gude iyo debedba.
 - Ogaanshaha aagagga rinjiga amadahaadhku ku sugan yahay xaalad liidata (jeexjeexan ama diiran) iyoi hubinta in si dhakhso ah loogu hagaajyo qaab liidh ahaan ammaan ah.
 - Xaqiijinta in dhammaan daaqadaha looxa ah ee ka horeeyey 1978 ay leeyihiin ciid ka ilaalisada daaqadda dabaqa hoose "window well".
 - Meesha ka saarista wixii ranji jajabay ah ee ku daadsan dhulka ee ka baxsan dhismaha.
 - Ka sameynta nadiifin gaar ah aagagga caamka ah.
- Saxeex bayaan u hoggaansanaan oo cadaynaya in Dhaqannada IRC la sameeyey isla markaana nuqul sii kiraystayaashiisa, qofka ku magacaaban caymiska, iyo Waaxda Caafimaadka ugu yaraan 365 maalmood.

SHAHAADADA IRC

Dhaqanada IRC waa in uu qabto qof shahaado u haysta Dhaqannada IRC - kani waxa uu noqon karaa kireeyaha ama maareeyaha guriga. Si uu u noqdo mid IRC shahaado ka haysta, shakhsigu waa in uu xaadira tababar Dhaqanada IRC ah oo ay ansixisay Waaxda Caafimaadka oo qaado imtixaan. Tababarka Dhaqannada IRC waxa lagu bixiyaa fool ka fool iyo onlayn ahaanba. Wadarta wakhtiga tababarka iyo imtixaanku waa ku dhawaad saddex saacadood. Waxa aad ka raadisaa tababar iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha Dhaqanada IRC barta <https://healthvermont.gov/IRC>. Waxa aad sidoo kale soo gudbin kartaa cabasho ku saabsan u hoggaansan la'aanta sharciga liidhka Vermont halka hoose ee websaytkan.

SHURUUDAHA RANJIGA LIIDHKA EE GURYAHA LA DHISAY KAHOR 1978 KII

Dhammaan guryaha la dhisay kahor 1978 kii waxa la qiyaasayaa in ay gudaha ama dusha ka marsanaayeen ranji liidh leh. Daadinta ranjiga liidhka, mararka qaar loo yaqaan "dib u hagaajin" ama "yareynta," ma aha mid uu sharcigu waajibiyo. Taas beddelkeeda, waa masuuliyad saaran kireeyaha in uu xaalad wanaagsan ku ilaaliyo ranjiga liidhka ah isla markaana uu sameeyo wixii cusboonaysiino ama dayactiro qaab liidh ahaan ammaan ah.

SHARCIGA LIIDHKA VERMONT CUSBOONAYSIIINTA, DAYACTIRKA, RANJIYEYNTA, IYO JOOGTAYNTA

Sharciga Vermont dhawaan ayaa la cusboonaysiiyey waxana lagu soo daray shuruudaha Cusboonaysiinta, Dayactirka iyo Ranjiyeynta ee EPA. Taasi waxa ay ka dhigan tahay haddii kireeye uu samaynayo shaqo cusboonaysiino, dayactiro, ranjiyeyn ama joogteyn (RRPM) taas oo faragelinaysa wax ka badan 1 fuudh oo laba jibbaaran oo oogooyin la rinjiyeyey ah qolkii gudaha ah ama oogo bannaanka ahba, shaqada waa in uu qabtaa shakhsi ama shirkad leh liisanada Vermont RRPM ee habboon, waana inay siiyaan kiraystayaasha macluumaad ku saabsan shaqada ay qabanayaan iyo waxyeellooyinka ranjiga liidhka.

Haddii uu yahay kireeye, maareeyaha guriga, ama qandaraasle uu kireeyuhu shaqaaleeyey, waa inuu adeegsado dhaqano shaqo oo liidh ahaan ammaan ah si uu u hubiyo dhaska iyo burburka liidhka in la weeleeyo. Tan waxa kamid ah adeegsiga salaxyo balaastig ah si loogu xakameeyo aagagga shaqada, taagista calaamado digniin oo ku baraarujinaysa dadka kale halisaha liidhka ee suuragalka ah, nadiifinta iyo xasilinta aagga shaqada maalin walba, nadiifinta dhammaan aagagga shaqada marka shaqada la dhameeyo si meesha looga dhammeeyo dhaska, jajabka rinjiga ama burburka aagga shaqada.

Taas marka laga yimaaddo, sharciga liidhka Vermont waxa uu mamnuucaadeegsiga dhaqanada shaqada aan ammaanka ahayn ee ay kamid yihiin daadinta ranjiga liidhka leh iyada oo loo marayo gubitaan, adeegsiga qori kulayl, ku maydhista cadaadiska, xoqitaanka qallalan, adeegsiga agabka ku shaqeeya korontada ogolaansho la'aan, iyo ku daadinta kiimikada. Dhaqanadan shaqada ee aan ammaanka ahayn waxa ay kordhiyaan halista u baylihitaanka liidhka.

Ka raadi macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha RRPM ee Vermont barta <https://healthvermont.gov/RRPM>

FAA'IIDOOYINKA SHARCIGA RANJIGA LIIDHKA

WAXA UU ILAALIYAA CARRUURTA dhaqanno dayactir oo joogto ah oo fudud waxa ay ka hortagi karaan carruurta inay u baylahaan liidh.

WAXA UU ILAALIYAA MULKIILAYAASHA GURYAHA


Mulkiilayaasha guryaha ee u hoggaansan sharciga waxa ay helaan ka ilaalin masuuliyad oo dheeraad ah.

WAXA UU ILAALIYAA SHAQAALAHA Sharciga liidhku waxa uu mamnuucaadeegsiga dhaqannada shaqooyinka aan ammaanka ahayn taas oo yareyn doonta u baylihidda shaqaalaha ee liidhka.

KU ILAALINTA GURIGA XAALAD WANAAGSAN

MARKA AY MASHAAKIL DHACAAN: TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Si dhakhso ah uga jawaab codsiyada dayactirka.
- Waxa aad ku samaysaa baadhitaano joogto ah guriga iyo dhismaha.
- Waxa aad u hoggaansantaa dhammaan codsiyada ama amarrada uu soo saaray masuul gobol ama deegaan.
- Waxyeelo kas ah ayaa loo tixgelin karaa in ay tahay kharibaad xaaladaha qaar.
- Baadheyaasha Ammaanka Caafimaadka iyo Dabka waa kuwo ay heli karaan mulkiilayaashu sidoo kale.



HADDII KIRAYSTUHU UU KA MASUUL YAHAY BIXINTA KHARASHKA ADEEGYADA GURIYEED EE AASAASIGA AH ISLA MARKAANA AAN LA SIIN

Haddii heshiiska kiradu ku waajibiyo kiraystaha in uu bixiyo kharashka wixii adeegyo guryeed daruuri ah (KULAYLKA, KORONTADA, BIYAHA, BIYAHA BULAACADDA) isla markaana lagaaga jaro kharash bixin la'aan awgeed, ikhtiyaaradaada waxa kamid ah:

- Kiraystayaashu waxa ay sababeen xadgudubyo loo geystay Xeerka Caafimaadka iyo/ama Ammaanka Dabka. Baadheyaasha Fulinta Xeerka, Masuullada Caafimaadka Magaalada iyo Baadheyaasha Ammaanka Dabka ayaa diyaar u ah inay ku kaalmeeyaan sidoo kale!
- Kiraystayaashu waxa ay ku xadgudbeen heshiiska kirada. Waxa aad bixin kartaa wargelin bixitaan sida uu waajibinayo sharcigu.
- Waxa aad adeega guriyeed ku soo wareejin kartaa magacaaga si aad uga hortagto waxyeellooyinka (tani waa ikhtiyaar, ma AHA mid uu waajibinayo sharcigu).
- Haddii kiraystayaashu ay sababeen in kulaylinta la xidho bilaha jilaalka isla markaana ay halis degdeg ah oo ah inay qasabaduhu qarxaan ay ku soo fool leedahay gurigaaga, waxa **DHICI KARTA** inaad qiil bixin sharciyeed u hesho xidhista biyaha iyo gororinta beebabka. **Badanaa raadso talo sharciyeed kahor inta aanad qaadin tallaabadan maaadaama oo xidhista adeegyada daruuriga ah ay guud ahaan mamnuuc tahay.**

U ADEEGSIGA "DAYACTIRKA IYO KA JARISTA" DAYACTIRADA YARYAR

- Haddii dayactirada aan la sameyn kadib codsiga hore, waxa aad dirtaa codsi qoraal ah. **Cadeyntu waa muhiim.**
- Ka feker inaad u adeegsato sharciga "Dayactirka iyo Ka Jarista" ee Vermont dayactirada yaryar.
 - Dayactirka iyo Ka Jaristu waxa uu waajibiyaa in kiraystuhu kusoo gudbiyo codsiga dayactirka qoraal ahaan kadibna uu siiyo mulkiilaha 30 maalmood oo uu ku sameeyo dayactirka. Waxa ku jirta [waraaq foom ah](#) oo loogu talagalay ujeedkan qaybta "Agabka" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.
 - Dayactirka la codsaday waa in uu noqdo wax loo baahan yahay si loogu hogaansamo xeerarka dhismaha, guryeynta, ama caafimaadka, ama uu yahay "xukun muhiim ah oo kamid ah heshiiska kirada."
 - Kadib 30 maalmood, kireystuhu waxa uu dalban karaa in loo sameeyo dayactirka ama isaga laftiisa ayaa sameyn kara isla markaana ka jari kara kharashka kirada bisha xigta. Kireystayaashu ma jari karaan wax ka badan kala badh kharashka kirada hal bil.
 - Nuqullada rasiidhada waa in loo geeyo mulkiilaha.
 - Kiraystayaashu waa INAANAY iyagu sameyn dayactiro u baahan farsamayaqaan liisan haysta, sida mid koronto, kuleylin, ama biyo gelin.
 - Ogolaanshooyin ayaa loo baahan karaa.
- Dayactirka iyo Ka Jarista waxa sidoo kale loo adeegsan karaa in mulkiilaha lagu kalifo in uu u hogaansamo shuruudaha heshiiska kirada ee qoraalka ah. Tusaale ahaan, haddii heshiiska kiro uu dhigayo in adeegyada sida saarista qashinka, beer falid ama baarkin ay ku jiraan, balse aan la bixin, kiraystaha ayaa sameyn doona in qabanqaabisto, oo ay kamid tahay in uu iska bixiyo baarkinka goobta ka baxsan.

"Haddii baahida dayactirku ay degdeg tahay, sida kulayl la'aan jiilaalka ah, ama haddii dayactirku uu yahay mid aad u qaalisan, waxa ugu wanaagsan in la adeegsado mid ama wax ka badan oo ikhtiyaarada hoos ku qoran ah halkii la samayn lahaa dayactirka iyo ka jarista.

DAYACTIRADA CAAFIMAADKA IYO AMMAANKA

- Waxa aad wacdaa [Masuulka Caafimaadka Magaalada deegaankaaga](#) ama Baadhaha Xeerka Dawladda Hoose si aad u codsato Baadhis Xeerka Caafimaadka Guryeynta Kirada ah. Baadhitaanada waxa lagu sameeyaa lacag la'aan. Baadhahaagu waxa uu awood u leeyahay in uu waajibiyoo in wixii Xadgudubyo Xeerar ah dib loo hagaajiyo.
- Waxa aad tagtaa [websaytka Waaxta VT ee Ammaanka Dabka](#) si aad u xareyso cabasho mashaakil ah ammaan dab, koronto, ama biyo gelin ah.
- Macluumaadka xidhiidhku waxa uu ku jiraa qaybta khayraadka ee kamid ah buug-hagitaaneedkan.

KA HAYSASHADA KHARASHKA KIRADA*

Sharciga Vermont waxa uu ogol yahay keliya **hal** sabab oo aad ku haysan karto kharashka kirada – oo ah xadgudubyo xeerka caafimaadka ama ammaanka noloshaha oo halis ah kuwaas oo saameeya **caafimaadka iyo ammaanka jidheed** ee kiraystaha iyo **keliya** kadib marka kiraystuhu qaaday tallaabooyinkan:

- Kiraystuhu waa in uu siiyo kireeyaha wargelin qoraal ah oo mushkiladda ah. Waxa ugu wanaagsan in lagu diro wargelinta boosta shahaadaysan.
- kireeyaha ayaa markaas kadib la siinayaa muddo wakhti ah oo macquul ah oo uu ku saxo mushkiladda.
- Xaddiga wakhtiga ah ee kireeye haysto si uu u sameeyo sixitaan waxa ay ku xidhan tahay waxa ay tahay mushkiladdu. (badanaa ma aha 30 maalmood.)

[9 V.S.A. Cutubka 137 §4458](#)

***Ka haysashada kharashka kiradu waa tallaabo halis ah waana in aan laqaadin illaa aad talo ka heshay u doode ama qareen kirayste oo xirfadle ah. Kiraystayaasha Vermont waxa ay la hadlaan dad badan sanad walba kuwaas oo aan raacin habraaca habboon isla markaana loo saaray sababtaas awgeed. Waa daruuri in kiraystuhu meel dhigo lacagta isla markaana uu u diyaariyo haddii ay dhacdo in mulkiiluhu bilaabo hannaanka saarista. (Waxa aad eegtaa "[Dhegaysiyada Meeldhexe Dhigista Kharashka Kirada](#)")**

Kiraystuhu waxa uu sidoo kale:

- Ku jebin karaa heshiiskiisa kiro wargelin macquul ah.
- Raadsan karaa amar garsooreed (heli karaa amar garsooreed).
- Xareyn karaa dacwad madani ah oo ka dhan kireeye.

HADDII MULKIILUHU UU MASUUL KA YAHAY BIXINTA KHARASHKA BIYAHA OO BIILKANA AAN LA BIXIN KHARASHKIISA:

- Bilaw inaad la xidhiidho [masuulkaaga Caafimaadka Magaalada](#).
- Haddii mulkiiluhu aanu u hogaansami doonin tilmaamaha masuulka ama haddii aanad awood u lahayn inaad sameeyso baadhis, weli waxa jira ikhtiyaaro.
- Sharci ayaa la ansixiyey 2015 kii siinaya kiraystayaasha ikhtiyaar ah in adeega biyaha lagu qoro magacooda haddii mulkiiluhu uu ku guuldarreysto in uu bixiyo kharashka biilka waana la xidhi doonaa adeegga guriyeed. Waxa uu dhigayaa:

Kiraystaha guri kiro ah oo bixiyey wargelin ah gu'itaan ku yimid dayacaad lacag bixiyuhu sameeyey waxa uu xaq u yeelan doonaa in uu codsado oo uu bixiyo kharashka adeegga sii socda ee adeegga guriyeed ama dib u sii deynta biyaha iyo adeegga bulaacadda guriga kirada ah, kaas oo adeegga guriyeed uu bixin doono. Haddii wax kharash dallacaad ama fii biyo ama bullaacad ah aan lagu darin kharashka kirada kiraystaha, kiraystuhu waxa uu ka jari karaa kharashka wixii kharash dallicid ama fii adeeg biyo iyo bulaacad ah ee laga siiyey dawladda hoose kiradiisa ama kiradeeda si waafaqsan 9 V.S.A. § 4459. (Dayactirka iyo Ka Jarista) Marka la eego duruufaha noocaas ah, adeegga guriyeed kuma waajibin doono kiraystaha in uu bixiyo wax kharash habsan ah oo ka badan hal wareeg kharash dallicid.

[24 V.S.A. § 5143\(c\)](#)

*Tani waxa ay ka dhigan tahay kiraystuhu in uu qaadi karo masuuliyadda bixinta kharashka biyaha, haddii biyaha lagu daray kharashka kirada. Waxa ay markaas ka jari karaan kharashka kharashbixintooda kirada billaha ah. Adeeggu kuma dallici karo kiraystaha wax ka badan hal wareeg kharash dallicid oo biilasha muddo dhaaftay ah.

HADDII MULKIILUHU UU MASUUL KA YAHAY BIXINTA KHARASHKA ADEEGYADA AASAASIGA AH (KULEYLKA, KORONTADA, BIYAHA, BIYAHA BULAACADDA) OO AAN LA SIIN:

- Ku bilaw inaad la xidhiidho Baadhaha Xeerka ama Xafiiska Caafimaadka Magaalada.
- Haddii mulkiiluhu aanu u hogaansami doonin tilmaamaha baadhaha ama haddii aanad awood u lahayn in aad samayso baadhis, waxa suuragal u noqon kara kiraystayaasha inay xareeyaan Amarka Gurmadka Xaaladda Degdegga ah ee gaarka u ah adeegyada guriyeed ee aasaasiga ah ee maxkamadda. Waxa aad la xidhiidhaa [Kiraystayaasha Vermont](#) ama qareen si lagaaga kaalmeeyo xaaladdaas oo kale.
- Tan ayaa ah ikhtiyaarka ugu wanaagsan xaaladaha wax ka badan hal guri ay adeegsadaan adeeg guri isla markaana aanay jirin saacado kala gaar ahi.

*** WANAAJINADA KIRAYSTAYAASHA EE SARE MA HELI KARAAN KIRAYSTAYAASHU HADDII MUSHKILADDU SI KAS AH AMA SI DAYACAAD AH AY U SABABEEN DEGANAYAASHA AMA MARTIDOODU.**

QAYBTA 5: MASHAAKIL CAAM AH

MASHAAKILKA KA DHEX DHACA JAARKA



Mashaakilka dhexmara xaafadaha jaarka ahi waxa ay noqon karaan kuwo caqabad ku ah dhammaan dhinacyada. Kiraystayaashu waxa ay badanaa dareemi karaan mulkiiluhu inaanu waxba ka qabaneynin oo mulkiilayaashuna waxa ay is arki karaan inay la wareersan yihiin wicitaanada cabashooyinka. Dhab ahaan, mulkiiluhu badanaa kama masuul aha marka xaafadaha jaarka ahi ay isla qabsan waayaan oo ikhtiyaaradooda xallinta khilafaadkuna ay xaddidnaan karaan.

Inkasta oo kireystayaashu ay xaq u leeyihiin "Inay Si Nabdoon ugu Raaxaystaan Dhismaha" haddana farqi weyn baa u dhexeeya laba kirayste oo aan isla qabsaneyn iyo "dhibaataynta." Dhibaatayntu waa mid hal dhinac ka socota.

Inta lagu gudo jiro muddada heshiiska kirada ee qoraalka ah, ikhtiyaarka keliya ee uu heli karo mulkiiluhu waxa uu noqon karaa ka joojinta kirada mid ama labada kirayste ee dhibaataada ku lug leh, taas oo keliya dhici karta haddii mulkiiluhu ku guulaysto dacwad saaris "Sabab Leh". Tani badanaa ma aha mid fudud oo ugu dambeyna qaaddi ayaa go'aamin doona. Laakiin, haddii kiraystayaashu aanay lahayn heshiis kiro muddo cayiman oo wakhti ah (tusaale ahaan, waxa jira heshiis kiro oo bil-calaa-bil ah ama waxa jirey heshiis kiro oo hore oo ah muddo sanad ah oo dhacay isla markaana aan la cusboonaysiin), kireeyayaasha intooda ugu badani waxa u sahlanaan karta inay sameeyaan saarid sabab la'aan ah ama cusbooneysiin la'aan ([ka eeg bogga 39](#) wixii faahfaahin ah).

TUSAALEYAAL AH XADGUDUBYADA LOO GEYSTO XAQA KIRAYSTUHU U LEEYAHAY KU RAAXAYSI NABADGALYO LEH:

- Cod xad dhaaf ah oo dhaca wakhtiyada ay u qorshaysay magaaladaadu inay yihiin "saacadaha mamnuucidda buuqa."
- Dhibaataynta inta lagu sugan yahay aagga caamka ah.
- Ku xadgudubka ama handaada kugu wajahan adiga ama martidaada.
- Waxyeello soo gaadha gurigaaga.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Hubi tixraacyada!
- Raadinta kiraystayaasha isla qabsan kara waxa ay gacan ka geysan kartaa in laga hortago mushkiladdan.
- Ka qaybgeli kiraystayaasha hadda inay kuu raadiyaan kuwo cusub. Waxa aad fursad u siisaa inay la kulmaan deganayaasha suuragalka ah.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Codka caadiga ah, ee maalinwalba ma aha xadgudub ka dhan ah xuquuqdaada.
- Waxa aad isku daydaa inaad xaliso mashaakilka kahor inta aanad ka qaybgelin mulkiilaha. "Inaad la qabsan weydo" jaarkaagu ma aha daruuri in ay noqoto mushkilad kireeyaha gurigaagu geystay.
- Ha la qasanin jaarka ku dhibaateeya.
- Haddii aad "ka jawaabto dhibaataynta" ama aad ka qaybqaadanayso la dagaalankooda, waxa aad sidoo kale noqon doontaa mid ku xadgudubay heshiiskaaga kirada.
- Waxa aad ugu sheegtaa xadgudubyada ku qoran hoos mulkiilaha qoraal ahaan.
- Marka ay habboon tahay, waxa aad u sheegtaa xadgudubyada *garan* Bilayska. Waxa aad nuqul warbixinta Bilayska ah u dirtaa mulkiilaha.
- Samir yeelo. Mulkiiluhu aayar ma saari karo jaarka xadgudubka samaynaya. Saaristu waxa ay qaadataa wakhti.
- Waxa aad la xidhiidhaa [Kiraystayaasha Vermont](#) si aad caawimo uga hesho.

DARYEELKA DAAQA IYO QAADISTA BARAFKA



- Mulkiilayaasha waajib kuma aha inay bixiyaan daryeel daaq ama qaadis baran iyada oo moojee ay ku jirtay shruudda heshiiska kirada.
- Marka baraf qaadis lagu daro, waxa ay guud ahaan ka dhigan tahay aagagga baarkinka iyo marinada gawaadhida, balse kama dhigna in majarafad lagaga qaado kadin kasta. Waxa aad kala hadashaa mulkiilaha in uu kuu caddeeyaa waxa uu sameyn doono iyo waxana aanu sameyn doonin.
- Haddii daryeel daaq aanu ku jirin heshiiska kirada waxa weeyi guud ahaan masuuliyadda kiraystaha.
- Haddii guriga aan la nidaamin illaa heer uu noqdo halis caafimaad dadweyne Baadhaha Xeerka ama Masuulka Caafimaadka Magaalada ayaa ku waajibin kara mulkiilaha in uu nadiifiyo. Xaaladdan, haddii daryeelka daaqu uu ahaa masuuliyadda kiraystaha, mulkiilaha ayaa ku dallici kara kiraystaha kharashaadka la galay.

BAARKINKA

- Mulkiilayaasha waajib kuma aha inay bixiyaan baarkin iyada oo moojee lagu daray shuruudda heshiiska kirada.
- Waa arrin sharci u ah mulkiilayaasha inay ku dallacaan kiraystayaasha aagga baarkinka, iyada oo moojee loo qoondeeyey ahaanshaha "Baarkinka Naafada."
- Haddii baarkinku uu ku jiro heshiiska kirada ee qoraalka ah oo aan la bixin, kiraystayaashu waxa ay adeegsan karaan "[Dayactirka iyo Ka Jaridda](#)" si ay ugu kelifaan kireeyaha in uu u hogaansamo heshiiska kirada.



DHIISHASHKA SATALAYDYADA IYO AANTAYNADA TV YADA

Inkasta oo adeegyadan aan lagaga hadal sharciyada kiraystaha kireeyaha Vermont, waxa lagaga hadlay sharciyada FCC.

[Xaashi Xaqiiqo oo ay soo saartay FCC](#) oo ku saabsan meelaynta aantaynada iyo dhiisashka ayaa laga heli karaa qaybta "Agabka" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.



WEECINTA KHARASHKA ADEEGYADA GURIGA

Weecinta Kharashka Adeegga Gurigu waa eraybixin loo adeegsado in lagu sharxo xaalad kirayste uu bixiyo kharashka adeegsiga adeegyada guriyeed oo ka baxsan gurigiisa. Tan waxa kamid ah aagagga caamka ah, guryaha kale, ama aagagga uu si gaar ah ugu adeegsado mulkiiluhu sida dhismeyaasha bannaanka ama gurigiisa gaarka ah ama ganacsigiisa. Haddii kirayste u malaynayo inay dhici karto inay bixinayaan adeegyo guriyeed oo aanu adeegsaneyn, waa inay ku bilaabaan la hadalka mulkiilaha. Haddii mushkiladda aan la xalin karin, halkan waxa ah qaar ah ikhtihaarada la heli karo:

IKHTIYAARADA AY HELI KARAAN KIRAYSTAYAASHU

- Xirfadlayaasha Korontada liisanka haysta intooda ugu badani ma rakibaan nidaamkaas waayirada oo kale. Haddii aad u malaynayso shaqada korontada in uu qabtay qof aan liisan haysan, waxa aad la xidhiidhaa Waaxda Vermont ee Ammaanka Dadweynaha, [Waaxda Ammaanka Dabka](#) si ay shaqada ugu hubiyaan ammaanka iyo u hogaansanka xeerarka korontada. Nuqul ka hel warbixinta.
- Dawladaha hoose oo wata xafiisyadooda Fulinta Xeerarka ayaa sidoo kale fulin kara qaar ah xeerarka ammaanka dabka.
- Haddii baadhistu muujiso in aad bixiso kharashka aagag ka baxsan gurigaaga, waxa aad qiyaastaa kharashbixintaada dheeraadka ah oo qaansheeg u dir mulkiilaha.
- Haddii xaaladda la xallin waayo, waxa aad u xareyn kartaa dacwad maxkamadda dacwadaha yaryar.
- Haddii aad ka shakido inaad bixiso kharashka aagag aan ku jirin gurigaaga, balse aanu jirin xadgudub ku wajahan xeer koronto ama ammaan dab, oo daruuri ka dhigaya baadhis rasmi ah, waxa aad shaqaalaysiin kartaa xirfadle koronto oo aad isku qabto adigu si uu u dukumenti gareeyo waxa aad bixiso waxana aad u adeegsan kartaa caddeyntan maxkamadda dacwadaha yaryar.

TALOYIN LOOGU TALAGALAY MULKIILAYAASHA

- Adeegyada guriyeed ee guri kasta waa in si gaar ah loo xisaabiya. Aagagga caamka ah waa in si kala gaar ah loogu xisaabiya akown ku qoran magacaaga.
- Haddii xisaabin gaar-gaar ah ay suurtagal noqon weydo, adeegga guriyeed waxa lagu dari doonaa kharashka kirada.
- Waa arrin sharci darro ku ah mulkiilaha in uu "dib uga iibiyo" adeeg guriyeed dawladeed, ee nidaamsan kiraystayaasha guryihiisa. Adeegyada guriyeed ee nidaamsan waxa kamid ah biyaha, korontada, iyo gaasta dabiiciga ah ee beebka.

QALABKA

- Mulkiilayaasha waajib kuma aha inay bixiyaan qalabka ay kamidka yihiin shoolad iyo tallaagad.
- Haddii qalabka la bixiyo, mulkiilaha waxa ku waajib ah in uu ku ilaaliyo xaalad shaqo oo wanaagsan.
- Mulkiiluhu waxa uu awood u yeelan karaa in uu iska ilaaliyo masuuliyadda dayactirka qalabka isaga oo ku daraya xukun heshiiska kirada sheegaya in aanu shaqo ku lahayn xaaladda qalabka, waxana uu si cad u sheegayaa in kiraystuhu uu masuul ka yahay dhammaan dayactirada qalabka.
- Haddii mulkiiluhu uu hagaajin waayo qalabka xumaaday ee uu masuulka ka yahay kiraystaha ayaa hagaajin kara oo lacagta ka jaranaya kharashka kirada. Waxa aad eegtaa "[Dayactirka iyo Ka Jarista](#)", qaabka habboon ee tan loo sameyn karo.

QAYBTA 6: GUURITAANKA

JEBINTA HESHIISKA KIRO

Heshiis kiro waa heshiis waajib ah sharciyeed. Cawaaqibta dhaqaale ee kirayste jebiya heshiis kiro waxa ay noqon karaan kuwo daran.

Sharciga Vermont waxa uu u ogolaadaa mulkiilaha in uu saaro kiraystaha masuuliyadda dhaqaale ee heshiiska kiro illaa guriga dib loo kiraysto. Waxa uu sidoo kale u ogolaadaa kiraystaha in uu ku dallaco kiraystaha kharashaadka macquulka ah ee la xidhiidha dib u kireynta.

SABABAHA SHARCIGA AH EE JEBINTA HESHIISKA KIRADA

- Xadgudubyo Caafimaad ama Ammaanka Nolosha ah oo Halis ah oo halis ku ah caafimaadka ama ammaanka deganayaasha balse **KELIYA KADIB:**
 - Kiraystuhu marka uu siiyo wargelin qoraal ah oo mushkiladda ku saabsan mulkiilaha.
OO
 - Mulkiilaha loo ogolaado muddo wakhti ah oo "macquul ah" oo uu ku saxo mushkiladda.
 - Haddii mushkiladda aan la xalin, kiraystuhu weli waa in uu bixiyaa "wargelin macquul ah" oo bixitaanka ah.
- Kiraystaha waxa loogu yeedhay waajibka shaqada milatari ee Ciidamada Qalabka Sida.
- Iyada oo qayb ka ah codsiga Fudaydinta Macquulka ah ee uu soo gudbiyo kireyste naafo ahi.
- Iyada oo qayb ka ah ilaalinada la siyo dhibbanayaasha xadgudubka guriyeed, xadgudubka galmeed, iyo dabagurka ee hoos yimaadda sharciga takoorka guriyeynta Vermont.

KIRAYSTAYAASHA TIXGELIYA JEBINTA HESHIIS KIRO WAA INAY HELAAN TALO SHARCIYEED KAHOR INTA AANAY SIDAAS SAMEYN!

TALOYIN LOOGU TALAGALAY MULKIILAYAASHA

- Adeegso Heshiis Kiro oo Qoraal ah
- Ogow in kirayste uu bixi karo wakhti kasta, balse haddii aad leedahay heshiis kiro muddo ka badan kiraystaha waxa la saari karaa masuuliyadda muddada heshiiska kiro.
- Haddii kirayste uu ka baxo xilli hore, kireeyuhu waxa uu waajib sharciyeed u leeyahay in uu isku dayo in uu dib u kiraysto guriga.



SHURUUDAHA WARGELINTA GUURITAANKA KIRAYSTAYAASHA

- **Sharcigu ma aha wargelin 30 maalmood ah, waxa weeyi:**
 - Wax aan ka yareyn wargelin qoraal ah Hal Muddo Kiro Dhamaystiran.
 - Haddii kharashka kirada la bixin karo maalinta koowaad, wargelinta waa in la bixiyo maalinta ugu dambaysa ee bisha si loo baxo maalinta ugu dambaysa ee bisha wargelinta.
 - Tusaale: Waxa aad bixisay wargelin markii ay ahayd ama kahor Juun 30keeda, muddada wargelintaadu waa bisha Julaay. Waxa aad baxaysaa ugu dambeyn saqda dhexe ee Julaay 31keeda.
- Wargelinta sare waa la dabaqayaa iyada oo moojee si kale lagu sheego heshiiska kiro. Haddii heshiiska kiro uu sheegayo 30 maalmood, taasi waa wargelinta ay tahay inaad bixiso, wargelinta guuritaanka bisha-badhtankeedana waa la ogol yahay. Haddii heshiiska kiro uu waajibinayo muddo wargelin oo intaas ka badan, waa inaad bixiso wargelinta la sheegay muddadaas gudaheeda. Tani waa run xattaa haddii heshiiska kiro ay muddadiisu dhammaatay.
- Sharciyada Magaalada Burlington waxa ay ku waajibiyaan kiraystaha guuraya in uu bixiyo wargelin LABA Muddo Kireed oo Dhamaystiran.
- Mulkiilayaashu waxa ay debaajida ka jari karaan kharashka wargelinta aan ku filneyn haddii ay waayaan dakhliga kirada.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Haddii kirayste uu ku siiyo wargelin afka ah oo sheegaysa in ay baxayaan, waxa aad ka codsataa inay qoraal ka dhigaan.
- Haddii kiraytuhu uu baxayo kahor dhammaadka muddada heshiiska kirada, waxa aad hubisaa inaad isku deydo inaad dib u kireysato guriga.
- Wakhtiga soo celinta debaajidu waxa uu kasoo bilaabmayaa taariikhda kiraystuhu baxo, ee kama bilaabmayo dhammaadka heshiiska kirada ama muddada wargelinta.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Waxa aad adeegsataa muunadda [Wargelinta Guuritaanka](#) ee lagugu siiyey qaybta "Tools" ee Buuggan.
- Waxa aad bixisaa inta wargelin ah ee aad bixin karto ee ka baxsan shuruudda sharciga ah.

FILASHOOPYINKA SHURUUDAHA GUURITAANKA

Xeerka guud ee la isla og yahay waa in kiraystayaashu kaga tagaan guriga xaaladdii ay ugu yimaadeen. Doogowga caadiga ah waa in la sii fishaa oo laga ma jari karo debaajida. Daryeelka joogtada ah ee muddada u dhaxaysa deganayaasha la sameynayo waxa ay noqon doontaa masuuliyadda mulkiilaha, oo ma noqon doonto kiraystaha.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Sawiro ka qaad wixii waxyeello ah.
- Ku samee indho-indhayn guriga adiga oo wata [liis hubin oo qoraal ah](#) (waa in uu noqdo isla foomka la adeegsaday markii lasoo guurayey).
- Waajib ma aha in mulkiiluhu joogo marka la sameynayo baadhista guuritaanka.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Ka dalbo mulkiilaha in uu kula indho-indheeyo guriga 2 illaa 3 toddobaad kahor guuritaanka. Ka dalbo in uu tilmaamo wixii dayactiro ah ee uu aaminsan yahay inay yihiin masuuliyaddaada.
- Haddii aanad hubin in dayactir uu yahay masuuliyaddaada ama inaanu ahayn, waxa aad wacdaa [Kiraystayaasha Vermont](#) si ay kuu kaalmeeyaan.
- Waxa aad qaaddaa sawiro kadib marka aad alaabtaada ka rarto oo aad nadiifiso guriga.
- Adiga ayaa masuul ka ah waxyeellooyinka ama shilalka ay geystaan martidaadu.

DIB U CELINTA IYO KHILAAFAADKA KA YIMAADDA DEBAAJIDA

Xaaladaha intooda badan khilaafyada ka dhasha debaajida waxa lagu xalliyaa Maxkamadaha Dacwadaha Yaryar.* Waa wax badanaa la doorbidi karo in labada dhinacba ay ka helaan caddeyn cad oo xaaladda guriga ah wakhtiga soo guuritaanka si ay isaga ilaaliyaan dacwad maxkamdeed ama inay caddeyn u noqoto haddii dacwad loo baahdo si loo xalliyo khilaafka.

*Burlington, Guddiga Dib U Eegista Guryeynta ayaa la adeegsan karaa halkii laga adeegsan lahaa Maxkamadda Dacwadaha Yaryar.

DIB U CELINTA DEBAAJIDA

- Sida uu dhigayo sharciga Vermont, mulkiilayaashu waa inay soo celiyaan debaajida, oo ay ku jirto faahfaahinta wixii ka jaritaano ah, muddo 14 maalmood ah gudahood oo ka bilaabmaya maalinta kiraystuhu ku wargeliyo in uu guurayo ama marka la ogaado in uu guuro.
- 14 ka maalmood waxa ay bilaabmaya maalin kadib marka kiraystuhu ka guuro guriga, iyada oo aan la eegayn taariikhda lagu sheegay wargelinta.
- Debaajiyadu waa inay noqdaan kuwo calaamadda boosta taariikheed ee ku taallaa tahay 14 maalmood gudahood, ee ma aha daruuri in ay gacanta kiraytaha ku jirto wakhtigaas.
- Haddii mulkiiluhu aanu garaneyn cinwaanka cusub ee kiraystaha, debaajida waa in lagu hagaajiyo cinwaankii u dambeeyey ee la garanayey (guriga kiraystuhu uu hadda uun ka guuray).

KHILAAFAADKA KA DHASHA DEBAAJIDA

- Haddii mulkiiluhu uu debaajida dib ugu celin waayo kiraystaha wakhtigii waajibka ku ahaa waxa uu waayayaa xaqii uu u lahaa ka jaridda waana in uu celiyaa iyada oo dhamaystiran. Tani kama dhigna kiraystaha inaan weli la saari karin masuuliyadda wixii lacag ah ee loogu lahaa waxyeellooyinka, adeegyada guriyeed ama kharashka kirada ee aanu bixin. Mulkiiluhu waxa uu dacwad u xareyn karaa Maxkamadda Dacwadaha Yaryar.
- Mulkiilayaashu waxa ay soo dallici karaan lacagta ay leeyihiin iyo waxyeellooyinka ee ka badan xaddiga debaajida.
- Haddii mulkiile si kas ah u haysto debaaji waxa ay saari kartaa masuuliyadda ah in uu soo celiyo labanlaab lacagta debaajida maxkamadda Dacwadaha Yaryar ama Guddiga Dib U Eegista Guryeynta midkood. Waa masuuliyad saaran kiraystaha in uu caddeeyo u kasidda.

HANTIDA AAN LA SHEEGAN KADIB GUURITAANKA


Tani waxa ay khusaysaa **keliya** hantida lagaga tagay guri kiro ah kadib;

- Kiraystuhu marka uu ku wargeliyo mulkiilaha in kiraystayaashu ay guureen, ama
- Kadib marka kiraystuhu uu guuray dhammaadkii muddadii heshiiska kirada.

[9 V.S.A. §4462\(d\)](#): *Wixii hanti shakhsiyeed ah ee ku hadhsan guriga deganaanshiyaha ama dhismaha la kiraystay kadib marka kiraystuhu ka guuro waa uu ka takhalusi karaa kireeyuhu isaga oo aan wargelin siin ama masuuliyad ka saarneyn kiraystaha ama mulkiilaha guriga shakhsiyeed.*

*Wixii ku saabsan hantida laga tago kadib saaritaanka ka eeg bogga [46](#)

*Wixii hanti ah ee laga tago marka guriga laga tago ka eeg bogga [47](#)



TIXRAACYADA

Ma jiraan wax sharciyo kireeye-Kirayste ah oo ka hadla waxa kireeyeeyuhu odhan karo ama aanu odhan karin marka laga dalbado in uu keeno tixraac ku saabsan kirayste. Tixraacyada waxa qaban kara sharciyada sumcad-dilka (qoraalka) iyo been-abuurka (bayaanada hadalka ah) haddii macluumaadka la bixiyey ay noqon waayaan run. Labadan sharci ayaa ku dabbaqmi kara fallooyinka ay mulkiilayaashu ka bixiyaan kiraystayaasha.

KIRAYSTAYAASHA: HADDII AAD U MALAYNAYSO KIREEYE HORE IN UU KAA BIXIYEV TIXRAAC XUN:

- Waxa ay noqon kartaa arrin aad dooni karto inaad kireeye ka reebto liiska. Laakiin, haddii aad ka reebto mulkiilaha isla markaana hay'adda guryeynta ama mulkiilaha guriga dhaqaale ahaan la kabo uu ogaado mulkiilaha, waxa lagu diidi karaa guriga iyada oo lagu salaynayo khimaayo ama inaad macluud dhamaystiran ku bixin weyday arjigaaga guriga.
- Isku day inaad la hadasho kireeyaha gurigaagii hore. Ka dalbo in uu ku siiyo tixraac fudud oo diiradda saaraya waxa aad ku wanaagsaneyd, sida inaad kharashka kirada bixiso wakhtigii loogu talagalay.
- Waxa aad tustaa in duruufuhu isbeddeleen, tusaale ahaan:
 - Maad bixin kharashka kirada muddo cayiman oo wakhti ah xaaladaha liita ee abaarmanka ka jira awgood.
 - Waxa aad ururisaa sawirada, warbixinada caafimaad, ama bayaanada aad ka heshay dadka arkay xaaladda abaarmanka.
 - Mushkilad caafimaad ama dhaqaale oo kugu sababtay inay dib u dhacdo kharashka kiradaadu taas oo la xalliyeey.
 - Qas ka dhacay gurigaaga oo uu sabab u ahaa xadgudub aad wajahaysay. Soo ururi bayaanada la taliyayaasha kuwaas oo garanayey xaaladdaada, warbixinada bilayska, ama amarrada u dhawaansho-la'aanta.
 - Waxa aad u heshay guri cusub xayawaankii carbiska ahaa ee kugu kellifay inaad jebiso xeerka xayawaan carbis ah la'aanta.
 - Imika waxa aad qaadataa adeegyada bulshada taas oo awood kuu siin doonta inaad u hoggaansanto heshiiskaaga kirada.
- Si ballaadhan u feker: ayo kale ayaa bixin kara tixraac? Waxa aad ka fekertaa tixraacyada shakhsiyeed, loo shaqeeyayaasha, macallimiinta, jaarka, maareeyayaasha kiiseed, iyo culimada diinta.
- Waxa jira qaabab kale oo aad ku muujin karto masuuliyad dhaqaale. Lahaanshaha akown shaqeeya iyo mid kayd waxa ay muujinaysaa inaad maarayn karto lacagtaada ama lahaanshaha saxeex-wadaag "co-signer" waxa ay ka caawimo ka geysan kartaa go'aanka kireeyuhu ka qaadanayo cidda uu ka kireynayo guriga.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Daacad noqo.
- Ku taagnaw macluumaadka la xaqiijin karo oo iska ilaali faallooyinka aragtida ku salaysan.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Tixraac xun oo lagaa bixiyo waxa uu kugu adkeyn karaa inaad hesho guri cusub.
- Noqo kirayste masuul ah - bixi kharashka kirada wakhtiga loogu talagalay, raac shuruudaha heshiiska kirada, daryeel guriga.
- Haddii ay jirto sabab aad u aamini karto tixraacu inaanu wanaagsanaan doonin, hore uga sheeg mulkiilayaasha guri ee aad doonayso inay wax kaa kireeyaan. Waxa badanaaba wanaagsan inay adiga kaa maqlaan halkii ay yaab la kulmi lahaayeen marka ay wacaan mulkiilaha gurigaaga kirada ee hadda.



QAYBTA 7: JOOJINTA KIRADA EE UU SAMEEYO MULKIILUHU

JOOJINTA KIRADA EE AY SABABTO BIXIN LA'AANTA KHARASHKA KIRADA

Wargelinta uu mulkiile siiyo kirayste si uu uga joojiyo kirada kiraystaha bixin la'aan kharashka kirada ah awgeed waa in ay buuxiso shuruudo gaar ah oo uu dejiyey sharciga Vermont. Wargelintu waa inay:

- Noqotaa qoraal isla markaana gacanta looga keenaa ama boosta loogu diraa kiraystaha (imeylka, farriimaha qoraalka ah, iyo farriimaha Facebook ma waafaqsana sharciga).
- Soo gaadhaa kiraystaha.
- Siisaa kiraystaha ugu yaraan 14 maalmood oo uu kusoo bixiyo kharashka kirada (oo aanay ku jirin maalinta wargelinta la bixiyey).
- Ku jirtaa xaddiga cayiman ee kharashka kirada habsanka ah ee la leeyahay (aanay ku jirin fiiga habsana, aanay ku jirin kharashka adeegyada guriyeed ee aan la bixin, aanay ku jirin kharashka debaajida ee aan la bixin).
- Sheegtaa taariikhda bixitaanka.
- U sheegtaa kiraystaha in haddii uu bixiyo kharashka kirada muddo 14 maalmood ah gudahood, in wargelinta la sixi doono.

Haddii wargelinta joojintu aanay u hogaansamin shuruudahan, kiiska maxkamadda waa la joojin doonaa.

TALOOPYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Haddii aad ogtahay in ay dhici karto inaad awoodi weydo bixinta kharashka kirada, waxa aad la hadashaa mulkiilaha kahor inta aan la gaadhin wakhtigii loogu talagalay.
- Waxa aad bixisaa inta ugu badan ee aad awooddo maalinta koowaad waxana aad u sheegtaa mulkiilaha taariikh aad hubto inta lagu gudo jiro bisha marka aad bixin doonto baaqiga.
- **Ha iska qarin mulkiilaha!**
Xaaladdu way kasii dari doontaa uun.
- Haddii ay kusoo gaadho wargelin, waxa aad la xidhiidhaa xafiiska Shaqada Bulshada ee deegaankaaga oo weydii inay ka jiraan aaggaaga barnaamijyo kaa caawin kara kharashka kirada habsanka ah.
- Haddii aad joojisay bixinta kharashka kirada mashaakil kaa haysta guriga awgood, waa inaad qaaday tallaabooyinka saxda ah (ka eeg [Haysashada Kirada](#) ee bogga 28). **Weli waa inaad hayso lacagta lagugu leeyahay!** Waxa ay u badan tahay in amar lagugu siiyo inaad bixiso oo aad ku shubto akown maxkamadeed inta lagu gudo jiro hannaanka ka saaritaanka. Haddii aanad haynin, mulkiiluhu waxa uu awood u yeelan karaa in uu helo waraaqaha daruuriga ah si uu kuugu saaro dhakhso. (Ka eeg [Dhegaysiyada Meel Dhexe Dhigista Kharashka Kirada](#) ee bogga 44)
- Haddii aad u baahato in lagaaa caawiyo dejinta miisaaniyadda, [Barnaamijyada Hawlaha Bulshada](#) ayaa bixiya adeegyada adeegyo la talin dhaqaale.

TALOOPYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Waxa ku jirta [wargelin muunad ah](#) qaybta "Agabka" ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan. **Wax isbeddelo ah ha ku sameyn, waxa aad sababi kartaa kiiska in la joojiyo!**
- Sugitaanka illaa kiraystaha dhawr bilood lagu yeesho kiro ma aha nidaamka ugu wanaagsan. Waxa jiri kara ikhtiyaaro caawimaad oo uu heli karo mulkiiluhu, balse maaha haddii lacagta uu leeyahay ay ka badan tahay laba bilood oo kharash kiro oo habsan ah.
- Kaalmada kirada habsanka ah waxa ay waajibisaa in kiraystuhu uu haysto wargelin joojin oo qoraal ah.
- Aaminaadda ah inay qaadata dhawr bilood in la saaro kirayste guud ahaan waxa sababa mulkiilaha oo wakhti aad u badan suga kahor inta aanu ugu dambeyn dirin Wargelinta. Haddii aad raacdo habraaca habboon xallintu waxa ay noqon doontaa mid dhakhso badan.

WARGELINTA JOOJINTA "SABABTA LEH".

Joojinta "sababta leh" waxa ay ka dhigan tahay in mulkiiluhu uu doonayo deganayaashu inay baxaan maadaama oo ay jebiyeen shuruudaha heshiiska kirada ama ay ku xadgudbeen sharciga kireeyaha kiraystaha ama sharciyada maxalliga ah.

Tusaalayaasha waxa kamid ah:

- Kiraystayaasha u ogolaada dadka kale inay soo guuraan iyada oo aan ogolaansho laga haysan mulkiilaha.
- Qasidda jaarka.
- Si kas ah u waxyeelidda guriga. (Tan waxa sidoo kale loo tixgelin karaa kharibaad sida ay dhigayaan sharciyada faldambiyeed.)
- Sababidda xadgudubyo Caafimaad ama Dab.
- Raacitaan la'aanta shuruudaha lagu sheegay heshiiska kirada.

Wargelinta uu mulkiile siiyo kirayste si uu uga joojiyo kirada kiraystaha bixin la'aan kharashka kirada awgeed waa in ay buuxiso shuruudo gaar ah oo uu dejiyey sharciga Vermont.

Wargelintu waa inay:

- Noqotaa qoraal isla markaana gacanta looga keenaa ama boosta loogu diraa deganayaasha (iimeylka, farriimaha qoraalka ah, iyo farriimaha Facebook ma waafaqsana sharciga).
- Soo gaadhaa kiraystaha.
- Sheegtaa sababta joojinta.
- Siisaa deganayaasha wakhti aan ka yareyn 30 maalmood oo ay ku baxaan. Haddii jebinta heshiiska kiro ay tahay hawl sharcidarro ama daroogo, wargelin aan ka yareyn 15 maalmood ayaa la bixin karaa.

TALOoyIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Waxa aad raacdaa shuruudaha heshiiskaaga kiro iyo dhammaan sharciyada la dabbaqo iyo sharciyada deegaanka.
- Ha u ogolaan dadka kale inay soo guuraan adiga oo aan ogolaansho **qoraal ah** ka haysan mulkiilaha.
- Kiradaada waxa loo joojin karaa ficillada martidaada iyo sidoo kale ficiladaada awgood.
- Laymanka xidhiidhka aad la leedahay mulkiiluhu ha furnaadaan.
- Haddii ay wargelin joojin ku soo gaadho oo sabab leh, waxa aad raadsataa kaalmo sharciyeed.

TALOoyIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Dukumenti garee xadgudubyada heshiiska kiro ee ay geystaan kiraystayaasha ama martidooda. Tan waxa sida ugu wanaagsan loogu sameyn karaa iyada oo macluumaadka ku saabsan waxa uu yahay xadgudubka qoraal ahaan loogu diro kiraystaha.
- Tixgeli inaad siiso kiraystayaasha wakhti kama dambeys ah oo ay ku saxaan mushkiladda haddii ay suuragal tahayba (tan ma waajibinayo sharcigu).

JOOJINTA KIRADA "SABAB LA'AAN"

Wargelinta joojinta ee "Sabab La'aanta ah" waxa ay ka dhigan tahay in mulkiiluhu doonayo kiraystuhu in uu guuro isaga oo aan wax khalad ah lahayn (tusaale, mulkiiluhu waxa uu doonayaa in uu u adeegsado guriga ujeedooyin kale). Wargelinta cusbooneysiin la'aanta heshiiska kirada waxa sidoo kale loo tixgeliyaa in uu yahay joojin Sabab La'aan ah. Marka uu jiro heshiis kiro oo wakhtigan ah, kirada looma joojin karo "Sabab La'aan" illaa la gaadho dhammaadka taariikhda heshiiska kirada waana in la bixiyo wargelin habboon sida lagu sharxay hoos.

Wargelinta uu mulkiile siiyo kirayste si uu uga joojiyo kirada kiraystaha sabab la'aan waa in ay buuxiso shuruudo gaar ah oo uu dejiyey sharciga Vermont. Wargelintu waa inay:

- Noqotaa qoraal isla markaana gacanta looga keenaa ama boosta loogu diraa deganayaasha (imeylka, farriimaha qoraalka ah, iyo farriimaha Facebook ma waafaqsana sharciga).
- Soo gaadhaa kiraystaha.
- Sheegtaa in kirada loo joojinayo Sabab La'aan ama in in hehsiiska kirada aan dib loo cusboonaysiin doonin, waxana aad siisaa taariikh cayiman oo bixitaanka ah.
- Siisaa deganayaasha wakhti aan ka yareyn muddada wakhtiga ah ee sharciga ah, ee waajibka ah ee guurista, sida lagu sheegay hoos.

MUDDOYINKA WARGELINTA SABAB LA'AANTA AH:

(Marka kharashka kirada la bixiyo bilwalba)

- **Haddii mulkiiluhu doonayo kiraystuhu in uu guuro dhammaadka muddada heshiiska kirada,** mulkiiluhu waa in uu bixiyo wargelin ugu yaraan 30 maalmood kahor dhammaadka heshiiska kirada, haddii kiraystuhu uu deganaa guriga wax ka yar 2 sano; 60 maalmood haddii kiraystuhu uu deganaa guriga wax ka badan laba sano.
- **Haddii heshiiska kirada ee hore uu dhammaado oo kiraystuhu uu usii waday bil-calaa-bil sida lagu sheegay heshiiska kirada,** mulkiiluhu waa in uu siiyaa wargelin ugu yaraan 30 maalmood ah kiraystaha ama 60 maalmood haddii kiraystuhu uu deganaa guriga muddo ka badan laba sano.
- **Haddii aanu marnaba jirin heshiis kiro oo qoraal ah:**
 - Haddii kiraystuhu uu ku noolaa guriga muddo ka yar 2 sano - wargelin aan ka yareyn 60 maalmood.
 - Haddii kiraystuhu uu ku noolaa guriga muddo ah 2 sano ama ka badan - wargelin aan ka yareyn 90 maalmood.
 - Haddii kiraystuhu uu ku noolaa guriga **ku yaalla Burlington** muddo ka yar 2 sano - wargelin aan ka yareyn 90 maalmood.
 - Haddii kiraystuhu uu ku noolaa guriga **ku yaalla Burlington** muddo ah 2 sano ama ka badan - wargelin aan ka yareyn 120 maalmood.

TALOOYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

Fadlan raadso talo sharciyeed kahor inta aanad dirin wax wargelin joojin ah haddii wax kamid ah xaaladahani jiraan:

- Kiraystayaasha gurigaagu waxa ay gudbiyeen ama gudbinayaan cabashooyin ku saabsan xaaladda guriga kirada ah.
- Kiraystaha gurigaagu waxa uu gudbinayaa cabashooyin ku saabsan xadugudbyo loo geystay xuquuqdiisa.
- Gurigaaga waxa dhawaan baadhay baadhe ah fulinta sharciga, ammaanka dabka, masuulka caafimaadka magaalada ama baadhe kale.
- Kiraystaha gurigaagu waxa uu gudbiyey codsi fudaydin macquul ah.
- Kiraystaha gurigaagu waxa uu ka qaybqaataa nidaaminta, ama waxa uu ku biiray jimciyad deganaasha ah.

JOOJINTA KIRADA HADDII KIRADU TAHAY GURIGA SHAKHSIYEED EE MULKIILAHA

Haddii kireystuhu ka kiraysto mid ama wax ka badan oo qolal ah guriga shakhsiyeed ee kireeyaha oo ay ku jirto adeegsiga la wadaago ee goobaha guriga ee caamka ah, sida qolka fadhiga, madbakha ama musqusha, markaa labada dhinacba waxa u bannaan inay joojiyaan kirada iyaga oo bixinaya wargelin qoraal ah ugu yaraan 15 maalmood haddii kirada loo bixiyo bilkasta iyo ugu yaraan toddoba maalmood haddii kirada loo bixiyo toddobaadwalba. Halkaa marka ay marayso ma cadda saameynta sharcigan uu ku yeelan doono xaaladaha uu jiro heshiis kiro oo qoraal ah oo aan ogoleyn joojin qaddin ah, ama mid dhigaya wakhti joojin oo kale.

JOOJINTA KIRADA IIBINTA DHISMAHA AWGII

Mulkiilayaashu waxa ay joojin karaan kirada si ay u iibiyaan dhismaha KELIYA haddii uu jiro Heshiis Iib iyo Gabadasho oo saxeehan oo leh iibsadeyaal suuragal ah, OO kiraystayaashuna aanay lahayn heshiis kiro oo hadda ah.

Haddii kiraystayaashu ay ku jiraan heshiis kiro oo hadda ah:

- Heshiiska kiro, oo ay la socoto debaajidu, waxa ay ku wareegaysaa mulkiilaha cusub marka iibku dhaco.
- Waa masuuliyad iibsadaha saaran in uu hubiyo in debaajida loo wareejiyey. Iyaga ayaa masuul ka noqon doona inay debaajida u celiyaan kiraystaha dhammaadka kirada waxkasta oo dhaca.

Haddii heshiiska kiro wakhtigiisu dhammaado ama aanu marnaba jirin heshiis kiro oo qoraal ah, mulkiiluhu waxa uu joojin karaa kirada isaga oo bixinaya wargelin qoraal ah oo aan ka yareyn 30 maalmood kadib marka uu saxeeho Heshiiska Iibka iyo Gadashada.

LA WAREEGITAANKA

Wakhti, waxa jirey shuruudo federaal iyo gobol oo ay ahayd in la raaco. Ilaalintadii federaalka ahaa waxa ay dhaceen 2014 kii, taas oo ka dhigan in aanay haddeed jirin wax ilaalinno federaal ah oo ay leeyihiin kiraystayaasha ku jiradhismayaasha lala wareegay. Sida uu dhigayo sharciga gobolka Vermont, kiraystayaasha waa la saari karaa iyada oo qayb ka ah hannaanka La Wareegitaanka Maxkamadda.

Sidee baad ku ogaan kartaa in dhismahaaga lala wareegay?

- Mulkiilaha dhismaha iyoi deganayaasha labadaba waxa la siin doonaa wargelinta hannaanka La Wareegitaanka maxkamadda.
- Deganayaasha, waraaqahan waxa lagu siin karaa boosta dabaqadda koowaad, markaa ha dhayalsan wixii waraaqo ah ee boosta laguugu soo diro.
- Haddii aad doonayso inaad hesho macluumaad ku saabsan xaaladda la wareegitaanka, deganayaashu waxa ay maxkamadda ugu sheegi karaan qoraal ahaan (geli hor imaatinka) cinwaankooda boosta.

SAARISTA SHAQAALAHA BEERTA

Shaqaalaha beeraha ee guri loo siiyo ka gunno shaqadooda ah ahaan aayar laga ma saari karo gurigooda haddii ay waayaan shaqadooda. Waxa ilaaliya sharciga kireeyaha/kiraystaha sida kiraystayaasha kale, haddii beerooluhu uu doonayo shaqaalaha beerta in uu ka baxo guriga beerooluhu waa in uu raaco habraacyada sharciyeed ee habboon. Sharcigu waxa uu u ogol yahay beeroolaha hannaan la dadajiyey oo uu ku saarayo shaqaalaha beerta, haddii beerooluhu uu soo bandhigi karo dhibaato.

Si uu u saaro shaqaalaha beerta, beerooluhu waa in uu u geeyey shaqaalaha wargelin joojin kiro isla marka maxkamad uga yeedhista iyo cabashada la diray. Maxkamaddu waxa ay u muddeyn doontaa dhegaysi muddo aan ka yareyn 10 maalmood kadib marka shaqaalaha loo direy. Dhegaysiga, haddii beeroole uu soo bandhigi karo in uu wajihi doono dhibaato dhab ah haddii shaqaaluhu uu ka bixi waayo guriga, qaaddigu waxa uu soo saari doonaa amar uu ku siinayo shaqaalaha inta u dhaxaysa shan iyo 30 maalmood in uu baxo. Haddii qaaddigu uu go'aansado in beerooluhu aanu caddeyn dhibaata dhabta ah, beerooluhu markaas waxa uu ku qasbanaan doonaa in uu bilaabo dacwadaha saarista ee caadiga ah si uu u saaro shaqaalaha, isla sida kiraystayaasha kale oo kale.

[V.S.A., 9, Cutubka 137, § 4469a.](#) Joojinta degaanshaha guriga shaqaalaha beerta

DHAMMAADKA MUDDADA WARGELINTA

Haddii kiraystayaashu ay weli degan yihiin guriga kirada kadib dhammaadka muddada wargelinta, tallaabada xigta ee mulkiiluhu waa in uu bilaabo hannaan saarid maxkamadeed. Keliya amar maxkamadeed oo kasoo baxay qaaddi, oo uu diray sarkaal, ayaa lagu saari karaa kirayste.

WAA ARRIN SHARCI DARRO AH IN KIREEYUHU:

- Ka saaro kirayste guriga.
- Beddelo qufullada.
- Xidho adeegyada guriyeed ee daruuriga ah.


Taas marka laga yimaado, haddii mulkiile uu usoo galo si uu u saaro alaabta ama u beddelo qufullada, waxa uu jebinayaa sharciyada Vermont ee [Gelitaanka Sharcidarrada ah](#) sharciyada faldembiyeed.

NIDAAMYADA UGU WANAAGSAN EE MULKIILAYAASHA

- Qaabka keliya ee aad deganayaasha uga saari karto gurigaaga waa hannaanka saarista maxkamadda, xattaa haddii aad u dirtay kiraystayaasha wargelin sabab la'aan ah.
- Waa inaad bilawdo dacwad maxkamadeed 60 maalmood gudahood oo ka bilaabma taariikhda joojinta ee ku qoran wargelinta ama kiiskaaga waa la joojin doonaa.

DIB U HAGAAJINADA KIRAYSTAHA EE SHARCIGA AH EE SAARISTA SHARCIDARRADA AH EE LA ISKU DAYEY:

- Haddii uu guriga kaa qufusho mulkiiluhu, waxa aad wacdaa Bilayska. Iyaga ayaa ka masuul ah "ilaalinta nabadda" inta aad helayso dib u gelitaanka (ku noqoshada gudaha).
- Waxa aad raadsataa kaalmo sharciyeed..
- Haddii adeegyada guriyeed ee daruuriga ah uu xidhay mulkiiluhu:
 - Waxa aad la xidhiidhaa [Masuulka Caafimaadka Magaalada](#) ee deegaankaaga. Waxa ay awood sharciyeed u leeyihiin inay amar ku siiyaan mulkiilaha in uu dib u furo adeegyada guriyeed. Waxa ku jira linki ku geynaya liis ah Masuullada Caafimaadka Magaalada ee Waaxda Caafimaadka ee Vermont websaytka Kiraystayaasha Vermont: <https://www.cvoeo.org/get-help/vermont-tenants-rights-and-resources>
 - Haddii aanad awood u lahayn inaad la xidhiidho Masuulka Caafimaadka Magaaladaada, ama haddii iyagu aanay awood u lahayn inay ku qanciyaan mulkiilaha in uu hogaansamo, waxa aad raadsataa Amar Gurmad Xadgudub oo Degdeg ah. Waxa aad la xidhiidhaa [Kiraystayaasha Vermont](#) (802.864.0099) ama qareen si ay kaaga kaalmeeyaan tan.



QAYBTA 8: MAXKAMADDA HANNAANKA SAARISTA

DIGNIINTA MULKIILAYAASHA!

- Cutubkan waxa loo bixinayaa ujeedooyin macluumaad oo keliya waxa ku jira talooyin maareyn.
- Ma aha sidee-loo-hagaa saarista kiraystayaasha gurigaaga.
- Mulkiilayaashu kiisas sharciyeed bay wajahayaan marka kiraystayaashu dacwado ka gudbiyaan.
- Fadlan raadso talo sharciyeed kahor inta aanad qaadin tallaabo ka dhan ah kiraystayaasha gurigaaga si aad u hubiso in xuquuqdaadu ilaashan tahay.*

DIGNIINTA KIRAYSTAYAASHA!

- Cutubkan waxa loo bixinayaa ujeedooyin macluumaad oo keliya waxana uu ka kooban yahay talooyin loogu talagalay la tacaalidda xaaladaha saarista.
- Ma aha sida-loo-hago diidista saarista.
- Kiraystayaashu kiisas sharciyeed bay wajahayaan marka mulkiilayaashu dacwado ka gudbiyaan.
- Fadlan raadso talo sharciyeed marka aad wajahayso saarid.*



*[Hage khayraad sharciyeed](#) ayaa ku jira qaybta Khayraadka ee kamid ah Buug-hagitaaneedkan.

ERAYBIXINTA SAARISTA

DHIBBANE - Dhinaca bilaaba dacwadda (badanaa kireeyaha).

EEDAYSANE - Dhinaca la dacweeyey (badanaa kiraystaha).

MAXKAMAD UGA YEEDHISTA - Dukumintiga maxkamadeed ee ku wargeliya Eedayanaha in la dacweeyey iyo tallaabooyinka ay tahay in uu qaado (sida. xareynta Jawaab).

DACWADDA - Dukumintiga sharciyeed ee sharxa cidda ay yihiin dhinacyada is hayaa, halka gurigu ku yaallo, waxa ay yihiin mushkiladaha dhex yaalla dhinacyada, iyo nooca gurmadka uu dhibbanuhu doonayo.

BAYAANKA DHAARTA AH - Dukuminti sharciyeed oo qof ku sheegayo isaga oo ku dhaaranaya in waxyaabo cayimani ay yihiin run.

MOOSHIN - Dukuminti loo xareeyey maxkamadda oo lagu codsanayo in maxkamaddu qaaddo tallaabo.

AMARKA HAYSASHADA - Dukuminti ay soo saarto maxkamaddu oo Sarkaalka awood u sinaya in uu kiraystaha ka saaro guriga isla markaana uu kireeyaha ku celiyo haysashada guriga kirada ah.

DHEGAYSIGA WANAAGYADA (DHEGAYSIGA WAXYEELLOOYINKA) - Dhegaysiga ay labada dhinacba kusoo bandhigaan caddeyntooda kiiska.

HANNAANKA MAXKAMADDA

Saarid maxkamadeed waxa bilaaba mulkiile, shirkadda maaraynta guriga, ama wakiilka mulkiilaha, isaga oo u xareynaya dukumintiyada loo yaqaano Maxkamad uga yeedhis iyo Dacwad maxkamadda isaga oo bixinaya fii xareyn oo ah \$295.

- Fiiga Xareyntu waa mid go'an laga soo bilaabo Noofember 2022. Maxkamaddu waxa ay kordhisaa fiiga xareynta marmar.
- Wakhtiga kiis la xareeyo, haddii sababta saaristu ay tahay bixin la'aan kharashka kirada ah, mulkiiluhu waxa uu codsan karaa Dhegaysiga Meel-dhexe Dhigista Kharashka Kirada isaga oo xareynaya mooshin iyo bayaan dhaar ah. Kadib dhegaysiga mooshinka maxkamaddu waxa ay amar ku bixin kartaa kiraystuhu in uu siiyo kharashka kiradiisa Maxkamadda. Haddii dhegaysiga Meel-dhexe Dhigista Kharashka Kirada la codsado, karraaniga maxkamadda ayaa soo saari doona wargelin dhegaysiga ah.
- Maxkamad uga yeedhista, Dacwadda, Mooshinka Meel-dhexe Dhigista Kharashka Kirada, Bayaanka Dhaarta, Wargelinta Dhegaysiga, Heshiiska Kirada Qoraalka ah (haddii uu jiro), iyo wargelinta Joojinta waa in kiraystaha uu u geeyaa Sarkaalka Degmadu.
- Kharashka in dukumintiyadan la diro waa \$50 qofkiiba oo ay dheer tahay masaafadda la socdaalay.

Marka kiraystaha uu dukumintiyada maxkamadda u geeyo sarkaalku:

- Kiraystuhu waxa uu haystaa 20 maalmood si uu uga jawaabo Dacwadda ama u xareeyo Mooshin si uu u Joojiyo Dacwadda (isaga oo ka dalbanaya Maxkamadda inay gebi ahaanba joojiso kiiska khalad sharciyeed oo uu kireeyuhu galay awgii).
- Haddii dhegaysiga meel-dhexe dhigista kharashka kirada la codsado, oo ay xaddido maxkamaddu, kiraystaha waa in loo geeyaa ugu yaraan 10 maalmood kahor dhegaysiga. Caadi ahaan dhegaysiga meel-dhexe dhigista kharashka kirada waxa la qabtaa wakhti ku dhow kiraystuhu ay tahay in uu jawaabo.

Hannaanka saarista maxkamadda waxa loogu talagalay mulkiiluhu in uu helo laba waxyaabood:

- Haysashada gurigiisa, iyo
- Amar Garsoor oo wixii lacag ah ee maxkamaddu go'aamiso in uu leeyahay mulkiiluhu.

Hannaanka maxkamadda waxa loogu talagalay kiraystuhu in uu:

- Xareeyo diidmo haddii Wargelinta Joojinta aan loo sameyn si sax ah.
- Soo bandhigo dhankiisa sheekada.
- Ka doodo wixii kharash ah ee lagu dallaco.
- Xareeyo wixii dacwado lid ah oo habboon (dhibaatayn, aargoosi sharcidarro ah, xadgudubyo loo geystay Damaanadda Ammaan Ahaanshaha Guriga, iyo xadgudubyo loo geystay Xeerka Ilaalinta Macmiilka.)
- Raadsado amar maxkamadeed oo faraya kireeyaha in uu ka joogsado tallaabooyinka sharcidarrada ah ama faraya kireeyaha in uu sameeyo dayactirrada daruuriga ah.

DHEGAYSIYADA MEELDHEXE DHIGISTA KHARASHKA KIRADA

Haddii kiraystuhu xareeyo "Mooshin Diidis" kahor Dhegaysiga Meel-dhexe Dhigista Kharashka Kirada, Maxkamaddu waxa ay badanaa go'aan ka gaadhi doontaa Mooshinka kahor inta aanay soo saarin amar meel-dhexe dhigis kharashka kirada ah. Haddii kireeyuhu doonayo in la siiyo wakhti uu kaga jawaabo Mooshinka kahor inta aanay maxkamaddu go'aan ka gaadhin, Dhegaysiga Meel-dhexe Dhigista Kharashka Kiradu waxa uu u dhaw yahay in dib loo dhigo illaa taariikh dambe.

Dhegaysigan, maxkamadu waxa ay go'aamin doontaa waxa soo socda:

- Inta uu yahay xaddiga kharashka kiradu.
- Haddii ay jirto ama aanay jirin kharash kiro habsan ah oo la leeyahay (daruuri ma aha inay go'aamiyaan inta ay tahay kharashka kirada habsanka ah ee la leeyahay).
- Marka kuwan la sameeyo, maxkamaddu waxa ay soo saari kartaa Amar Meel-dhexe Dhigis Kharashka Kirada ah.
- Amarkani waxa uu ku waajibinayaa kiraystayaasha in ay kharashka kiradooda siiyaan maxkamadda illaa inta hannaanka saaristu socdo.
- Haddii kiraystuhu bixin waayo kirada sida ay ku amartay maxkamaddu, Amar Haysasho ayaa lasoo saari karaa.

Kharash kiro intee le'eg ayey maxkamaddu ku amri kartaa kiraystaha in uu bixiyo sida uu dhigayo Amarka Meel-dhexe Dhigista Kharashka Kiradu?

- Maxkamaddu waxa ay amar ku siin kartaa kiraystaha in uu bixiyo wixii kharash kiro ah ee ku ururay intii kiisku ka xareysnaa maxkamadda.
- Maxkamaddu iyada ayaa go'aanka leh ay ku amrayso kharashbixin intii hore ka yar kiraystaha, ama inay u ogolaato lacagta in loo bixiyo qaab debaaji ah.
- Maxkamaddu sidoo kale waxa ay awood u leedahay inay amarto keliya kharashbixinada mustaqbalka (sida. bisha xigta).
- Maxkamaddu waxa ay yareyn kartaa xaddiga kharashka kirada bishii ee kiraystuhu ay tahay in uu bixiyo haddii kiraystuhu uu soo gudbiyo sheegasho lagu qanci karo oo ah in xaaladaha guriga kirada ah aanay u hoggaansaneyn Damaanadda Ammaan Ahaanshaha Guriga (*Eeg Qaybta 4: Xeerarka Guriyeynta ee bogga 20*).
- Haddii kiraystuhu uu hor iman waayo maxkamadda, mulkiiluhu waxa uu codsan karaa in kharashbixinta ugu horaysa wakhtigeedu noqdo "X" tiro maalmood kadib dirista amarka.

Maxaa dhacaya haddii kiraystuhu uu iman waayo dhegaysigan?

- Maxkamaddu waxa ay soo saari doontaa amarka meel-dhexe dhigista kharashka kirada.
- Sarkaalku waa in uu amarka u geeyaa kiraystaha si loo fulin karo.

Maxaa dhacaya haddii kiraystuhu kharashka siiyo maxkamadda sida uu dhigayo amarku?

- Iyada oo dhinacyadu ku heshiiyaan si kale moojee, maxkamaddu waxa ay haynaysaa lacagta la siiyey maxkamadda illaa dhegaysi kama dambeys ah oo kiiska ahi uu qabsoomo. Wakhtigaas, qaaddigu waxa uu go'aansanayaa in lacagta uu mutaystay mulkiiluhu ama ay inay tahay in loo celiyo kiraystaha (tusaale ahaan, haddii ay ka jiraan mashaakil caafimaad ama ammaan oo la rumaysan karo guriga).

Maxaa dhacaya haddii kiraystuhu uu bixin waayo Amarka Meel-dhexe Dhigista Kharashka Kirada?

- Mulkiiluhu waxa uu u xareyn karaa mooshin iyo qoraal dhaar ah maxkamadda uu ku codsanayo in maxkamaddu soo saarto Amarka Haysashada kharash bixin la'aanta kiraystaha awgii.
- Maxkamaddu waxa ay soo saaraysaa Amarka Haysashada.
- Mulkiiluhu waxa uu sarkaalka ka dalbanayaa in uu Amarka Haysashada u geeyo kiraystaha.
- Sarkaalku waxa uu dib ugu celinayaa haysashada wakhti aan ka dambeyn shan maalmood oo shaqo kadib geynta Amarka.
- Mulkiiluhu waxa uu sii wadi karaa hannaanka maxkamadda si uu ugu helo Amar Garsoor ama dhegaysi (haddii kiraystuhu ka jawaabay Dacwadda) ama qaab Dood lid ah la'aan ah (dhegaysi la'aan maadaama oo Kiraystuhu aanu soo jawaabin).

'DACWADDA'

- Dacwaddu waa waraaqaha maxkamadda ee uu xareeyo mulkiiluhu ee soo koobaysa cidda ay yihiin dhinacyada is hayaa, halka gurigu ku yaallo, waxa ay yihiin mashaakilka ka dhexeeya dhinacyadu, iyo nooca gurmadka ee dhibbanuhu doonayo (sida. xukunka haysashada iyo lacagta.
- Dacwadda waxa caadi ahaan loo soo bandhigaa qaab faqrad lambaraysan oo kale.

'JAWAABTA'

- Waa jawaabta kiraystuhu ka bixiyo Dacwadda. Waa inay:
 - Ka hadasho qodob kasta oo lambar leh oo ku jira Dacwadda. Qaar badan oo kamid ah su'aaluhu waa run ama been waxana loo adeegsadaa in lagu xaqiijiyo wixii xaqiiqooyin ah ee la isiu hayo ee kamid ah kiiska, sida mulkiilaha guriga, kiraystayaasha guriga, xaddiga kharashka kirada, iwm.
 - Lagu soo celiyo maxkamadda muddo aan ka yareyn 20 maalmood.
 - Nuqullo waa in loo diro Mulkiilaha iyo Qareenkiisa.
 - Jawaabtu waa halka kiraytuhu ku sheego dhinaciisa sheekada.
- Kiraystuhu waxa uu sidoo kale xareyn karaa diidmo ama waxa uu xareyn karaa ama lid ahaan u xareyn karaa dacwado ka dhan ah mulkiilaha wakhtigan haddii loo baahdo.
- Haddii kiraystuhu ka Jawaabi waayo Dacwadda, Mulkiiluhu waxa uu xareyn karaa Xukun Dood Lid ah La'aan ah. Codsigan waxa lagu sameeyaa Mooshin iyo Bayaan Dhaar ah oo lacagaha la leeyahay ah.
- "Xukun Dood Lid ah La'aan ah" waxa uu ka dhigan yahay in dhinaca kale guulaystay iyada oo aan la qaban dhegaysi.

DHEGAYSIGA KAMA DAMBEYSTA AH

(LOO YAQAANO DHEGAYSIGA WANAAGYADA,
DHEGAYSIGA WAXYEELLOOYINKA, DACWAD
MAXKAMADEED)

- Waa wakhtiga ay labada dhinacba soo bandhigeen dhammaan cadeynta ay hayeen oo maxkamadduna go'aan ka gaadho cidda lagu leeyahay lacag.
- Dhammaan markhaatiyadu waa inay joogaan dhegaysigan.
- Wixii rasiidho, cadeyn bixin kharash kiro, iyo dukumintiyada kale ah (oo ay kamid yihiin sawiradu) ayaa lasoo bandhigaa inta lagu gudo jiro dhegaysigan.
- Haddii aanad haysan dukuminti/sawir/markhaati, maxkamadu ma tixgelin doonto taariikh dambe dibna uma muddeyn doonto maxkamaddu dhegaysiga si aad u keeni karto caddeymo dheeraad ah.
- Wargelinta dhegaysiga waxa soo diri doonta maxkamadda - tani waxa ay kuu sheegi doontaa taariikhda iyo wakhtiga dhegaysiga.
 - Haddii cinwaankaagu isbeddelo oo aanad ku wargelin maxkamadda, waxa dhici karta inaanad helin wargelinta dhegaysiga ee kuu sheegaysa goorta uu yahay dhegaysigu.
 - Inaad cusboonaysiin weydo cinwaankaaga boostu sabab uma noqonayso in dhegaysi cusub lagu muddeeyo.

AMARKA LAHAANSHAHA

Amar Haysasho waa Xukun ay amartay maxkamaddu oo u ogolaanaya Sarkaal in uu saaro deganayaasha mulkiilaha u ogolaanaya in uu beddelo qofullada.

- Marka Sarkaalku uu Amarka Haysashada u geeyo Eedayanaha, Sarkaalku waxa uu siin doonaa Eedayanaha taariikh bixitaan.
- Taariikhda bixitaanku waxa ay noqon doontaa wakhti aan ka horeyn 5 maalin ganacsiyeed (siin la'aanta kharashka kirada maxkamadda) ama wakhti aan ka horeyn 14 maalin ganacsiyeed (xukunka kama dambeysta ah).
- Haddii Eedayanuhu uu bixi waayo, Sarkaalku waxa uu kusoo noqon doonaa guriga waxana uu ilaalin doonaa ammaanka inta kireeyuhu uu beddelayo qofullada guriga. Tan waxa la yidhaa "Fulinta Amarka Haysashada"


*** Haddii kiisku uu yahay bixin la'aan kharashka kirada ah, kiraystuhu waxa uu ku baajin karaa Fulinta Amarka isaga oo siiya dhammaan lacagaha lagu leeyahay maxkamadda kahor taariikhda fulinta. Tan waxa kamid ah dhammaan kharashyada kirada habsanka ah iyo badanaa kharashaadka maxkamadda ee mulkiilaha iyo fiiga sharciyeed haddii la dalbado. Tan waxa uu kiraystuhu sameyn karaa keliya halmar 12 kii biloodba.**

HANTIDA KIRAYSTAHA KADIB KA SAARISTA

Sida uu dhigayo Sharciga Vermont ([12 V.S.A. Qaybta 4854a](#)), mulkiiluhu waa uu ka takhalusi karaa wixii shayo ah ee laga tagay marka la buuxiyo labada shardi ee soo socda:

- 15 maalmood marka ay kasoo wareegeen geyntii Amarka Haysashada;* **IYIO**
- kireeyuhu marka uu lasoo noqday haysashada guriga.

*** MA jiro shardi dhigaya in mulkiiluhu hayo ama keydiyo hantida kiraystaha wax ka badan 15 maalmood.**



QAYBTA 9: KA TEGISTA GURI KIRO

Sida uu dhigayo Sharciga Vermont, Mulkiiluhu waxa uu u tixgelin karaa guriga in laga tagay haddii DHAMMAAN bayaanada soo socda ay run yihiin:

- Kiradu aanay socon; **IYO**
- Inay u muuqao inaan cidi ku noolayn guriga ah degane rasmi ah; **IYO**
- Mulkiiluhu in uu sameeyey isku day macquul ah si uu u xaqiijiyo qorsheyaasha kiraystaha.

HANTIDA AAN LA SHEEGAN KADIB KA TEGITAANKA GURIGA

Haddii wax hanti ah, marka laga reebo xashiishka, qashinka, ama walxaha duugoobay, uu sheegan waayey kiraystaha ka tagay guriga, mulkiiluhu waxa uu siin doonaa wargelin qoraal ah kiraystaha, waxa ugu diri doonaa cinwaankii ugu dambeeyey ee la garanayo ee kiraystaha, sheegaysa in mulkiiluhu doonayo in uu ka takhaluso hantida kadib 60 maalmood haddii kiraystuhu aanu sheegan hantida oo uu bixiyo kharashka wixii keydin ah ee suuragal ah iyo fiiga kale ee uu galay mulkiiluhu.

- Mulkiiluhu waa in uu ku keydiyo hantida kiraystaha meel ammaan ah, oo qallalsan muddo aan ka yareyn 60 maalmood.
- Kiraystuhu waxa uu ku sheegan karaa hantida isaga oo siinaya mulkiilaha waxyaabaha soo socda muddo 60 maalmood ah gudahood kadib taariikhda wargelinta.
 - Sharraxaad guriga ah oo macquul ah oo qoraal ah; **IYO**
 - Bixinta kharashka cadaaladda ah ee macquulka ah iyo wixii kharashaad macquul ah ee la xidhiidha kharashaadka uu galay mulkiiluhu.
- Haddii kireystuhu aanu sheegan guriga wakhtiga loo baahan yahay, hantidu waxa ay noqon doontaa hantida mulkiilaha.
- Haddii kiraystuhu uu sheegto hantida wakhtiga loo baahnaa gudihisa, mulkiiluhu waa in uu si dhakhso ah alaabta ugu diyaariyaa kiraystaha goob macquul ah kiraystuhuna waa in uu la la wareego hantida wakhtigaas iyo goobtaas

Tani ma waxa ay ka dhigan tahay in mulkiiluhu ku sameyn karo waxa uu doono hantida?

- Haa, mulkiiluhu waxa uu uga takhalusi karaa hantida hadba sida uu u arko munaasab.

Ka waran haddii mulkiiluhu diido in uu celiyo hantida isaga oo kiraystuhu isku dayaya in uu sheegto?

- Haddii kireeyuhu sharraxaad qoraal ah oo macquul ah ka bixiyo hantida lasoo celinayo, isla markaana bixiyo kharashka keydinta, balse kireeyuhu diido in uu hantidan celiyo kiraystuhu waxa uu xareyn karaa Dacwad Madani ah oo ka dhan ah mulkiilaha si hantidiisa loogu soo celiyo.

TALOOYIN KU SOCDA MULKIILAYAASHA

- Dukuminti garee dedaalada aad ugu jirto inaad raadiso kiraystaha haddii aad u malaynayso in guriga laga tagay.
- Waxa aad wacdaa dhammaan lambarrada aad ka hayso kiraystaha, oo ay kamid yihiin dadka lala xidhiidhayo xaaladda degdegga ah.

TALOOYIN KU SOCDA KIRAYSTAYAASHA

- Xaalad kasta oo mulkiilaha ay waajib ku noqoto in uu keydiyo hantidaada, tallaabada keliya ee haddii mulkiiluhu kuu soo celin waayo aad qaadi kartaa waa inaad xareyno Dacwad Madani ah.
- Waa hantidaadii. Ikhtiyaarka ugu wanaagsani waa inaad masuul ka noqoto oo aanad hanti muhiim ah ka tegin.
- Haddii mulkiiluhu uu kharash u galo qaadisteeda, waxa uu xareyn karaa dacwad kaa dhan ah adiga oo lacagta uu kharash gareeyey ah.

LADHKA A: AGABKA

WARAAQAHA FOOMAMKA EE KIRAYSTAYAASHA

- 49 [Galaangal Helista Kireeyaha iyo Qarsoodnimada Kiraystaha](#)
- 50 [Wargelin Kordhin Kharash Kiro oo aan Ku Filneyn \(Burlington\)](#)
- 51 [Wargelin Kordhin Kharash Kiro oo aan Ku Filneyn \(Gobolka oo dhan\)](#)
- 52 [Fiiga Habsanka](#)
- 53 [Jebinta Xeerka Weyn/Codsiga Dayactirka](#)
- 54 [Wargelinta Guuritaanka \(Ka socota Kiraystaha ee ku socota Mulkiilaha\)](#)
- 55 [Wargelinta Dayactirka iyo Ka Jarista](#)
- 56 [Foomamka iyo Habraacyada Codsiga Fudaydinta/Wax Ka Beddelka Macquulka ah](#)
- 57 [Siyaasadda Codsiga Fudaydinta Guriga \(ee Qof Naafo ah\)](#)
- 58 [Codsiga Wax Ka Beddelka Guriga \(ee Qof Naafo ah\)](#)
- 59 [Xaqiijinta Xaaladda Ka Qof Naafo ah ahaan](#)
- 60 [Codsiga Soo Celinta Debaajida](#)

WARAAQAHA FOOMAMKA EE MULKIILAYAASHA

- 61 [Sheegista Ranjiga Liidhka](#)
- 62 [Dhejiska Wargelinta Ranjiga Liidhka](#)
- 63 [Joojinta Kirada ee ay sababto Bixin La'aanta Kharashka Kirada](#)

AGAB DHEERAAD AH

- 64 [Liiska Hubinta Baadhista](#)
- 67 [Miisaaniyad muunad ah oo loogu talagalay kiraystayaasha](#)
- 69 [Macluumaadka FCC ee ku saabsan Aanteenada Satalaytka](#)
- 70 [Caymiska Guryaha Kirada ah](#)
- 71 [Caymiska Kirada](#)

WARAAQDA FOOMKA GALAANGAL HELISTA IYO QARSOODINIMADA

DATE: _____

TO: _____
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

RE: Landlord Access at _____
(ADDRESS)

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

I am writing to inform you of the law regarding landlord access. Pursuant to chapter 137, section 4460 of the Vermont state statutes, a landlord may enter the unit with the tenant's consent. Without consent, a landlord can enter the unit between 9:00 A.M. and 9:00 P.M. on no less than 48 hours notice to:

1. Inspect the premises;
2. Make necessary or agreed repairs, alterations, or improvements;
3. Supply agreed services; or
4. Exhibit the unit to prospective or actual purchasers, mortgagees, tenants, workers or contractors.

A landlord can only enter the unit without consent or notice when there is a "reasonable belief that there is imminent danger to any person or property."

I thank you in advance for complying with the law.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

WARGELIN KORDHIN KHARASH KIRO OO AAN KU FILNEYN (BURLINGTON)

DATE: _____

TO: _____

RE: Rent increase notice at _____
ADDRESS

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER, MANAGER

I am writing to inform you of my intentions based on the Burlington City Ordinance regarding rent increase notices. Pursuant to Chapter 18, Housing, Sec. 18-29a(c) of the Code of Ordinances of the City of Burlington, a landlord may increase rent by giving 90 days advance written notice.

You provided me with notice of an increase on _____.

Therefore, the increase should not legally take effect until _____, the date my next rent payment is due after "no less than 90 days actual notice" and I will not begin paying the increased rent until this date.

I thank you in advance for recognizing my legal rights in this matter.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

WARGELIN KORDHIN KHARASH KIRO OO AAN KU FILNEYN (GOBOLKA OO DHAN)

DATE: _____

TO: _____

RE: Rent increase notice at _____.
ADDRESS

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

I am writing to inform you of my intentions based on the law regarding rent increase notices. Pursuant to VSA Title 9, Chapter 137, Section 4455(b) of the Vermont state statutes, a landlord may increase rent "on the first day of the rental period following no less than 60 days actual notice to the tenant."

You provided me with notice of an increase on _____.

Therefore, the increase should not legally take effect until _____, the date my next rent payment is due after "no less than 60 days actual notice" and I will not begin paying the increased rent until this date.

I thank you in advance for recognizing my legal rights in this matter.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

FIIGA HABSANKA

DATE: _____

TO: _____
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

RE: Late Fees at _____.
(ADDRESS)

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

I am writing to make you aware of the Vermont case law regulating the practice of charging late fees. According to Highgate Associates, Ltd v. Lorna Merryfield, Supreme Court Docket No. 90-032, landlords may only charge a tenant a late fee to cover expenses actually incurred as a result of the tenant's tardiness in paying rent. Such a fee may not simply be a penalty. A late fee which is not reasonably related to the landlord's expenses is invalid and the tenant does not have to pay it.

I am requesting that you present documentation showing that the fee is equal to your expenses. If you cannot or will not show this documentation, I am under not obligation to pay the late fee.

I thank you in advance for recognizing my legal rights in this matter.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

JEBINTA XEERKA WEYN/WARAAQDA FOOMKA CODSIGA DAYACTIRKA

DATE: _____

TO: _____
NAME OF PROPERTY OWNER/MANGER

RE: Notice of problem(s) at _____.
ADDRESS

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

I am writing to make you formally aware of serious problems existing at

_____. The following needs to be done:
ADDRESS

Pursuant to chapter 137, sections 4457 and 4458 of the Vermont state statutes, a landlord is required to maintain premises that are safe, clean, and fit for human habitation and that comply with housing and health regulations. If a landlord fails to comply with those obligations within a reasonable time and this noncompliance affects health and safety, a tenant may:

1. Withhold the payment of rent for the period of noncompliance;
2. Obtain injunctive relief;
3. Recover damages, costs and reasonable attorney's fees; and
4. Terminate the rental agreement on reasonable notice.

I request that these problems be taken care of as quickly as possible. If a reasonable effort to fix these problems is not made, I will be pursuing one or more of the above legal options which may specifically include withholding rent payment. Let this serve as your notice of my intent to pursue such action(s).

I thank you in advance for recognizing my legal rights in this matter.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

WARGELINTA GUURITAANKA (KA SOCOTA KIRAYSTAHA EE KU SOCOTA MULKIILAHA)

DATE: _____

TO: _____
NAME OF PROPERTY OWNER/MANGER

RE: Move out notice

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

You are hereby advised of my intent to vacate the rental property at

_____ on or before _____
ADDRESS DATE

in accordance with the proper notice period circled below. I will be cleaning the apartment as to leave it in the same condition as it was on the move-in date. Please send me specific move-out instructions if you have any.

1. According to the terms of my lease requiring a ____ day / or ____ full rental period notice.
2. According to V.S.A., TITLE 9, Chapter 137 §4456d requiring one full rental period notice.
3. According to Burlington ordinance Ch 18 Article II Div.1 Sec 18-29a.(b) requiring two full rental period notices.

I will remove my personal belongings and turn in the keys on or before the date mentioned above.

If you have any questions, please contact me at ____-____-_____.

Thank you for your courtesy and services during the period of my lease.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

WARAAQDA FOOMKA DAYACTIRKA IYO KA JARISTA

DATE: _____

TO: _____
NAME OF PROPERTY OWNER/MANGER

RE: Notice of problems at _____.
ADDRESS

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANGER

I am writing to make you aware of problems existing at _____.
ADDRESS

The following needs to be done:

I request that this be taken care of as quickly as possible. Pursuant to Chapter 137, Section 4459 of the Vermont state statutes, if the situation has not been taken care of within 30 days of this notice, then it is my right to remedy the problems myself and deduct the cost from my rent.

I thank you in advance for taking care of these problems.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

CODSIGA FUDAYDIN MACQUUL AH/ WAX KA BEDDEL: FOOMAMKA IYO HABRAACYADA

SHURUUDAHA BIXIYEYAASHA GURIYEYNTA

Loogu talagalay dadka u qalma sida uu qeexay sharcigu (dadka naafada ah), Bixiyeyaasha Guriyeynta waxa ku waajib ah inay:

- (a) Ku bixiyaan fudaydino macquul ah siyaasadahooda, xeerarkooda ama nidaamyadooda (sida siyaasadaha ku saabsan xayawaanada carbiska ah, baarkinka, iwm.); **IYO**
- (b) Ogolaadaan wax ka bedelada macquulka ah (wax ka beddeledda walxeed, sida wadada gaadhi curyaanka ama birta laqabsado). Marka ay tahay guri kiro oo gaar ah, kiraystuhu waxa uu masuul ka noqon karaa kharashka wax ka bedelka. Marka ay noqoto guriga kirada ee dawladdu kabto, Bixiyaha Guriga ayaa masuul ka noqon kara.

Marka la tixgelinayo codsi fudaydin/wax ka beddel macquul ah, Bixiye Guriyeyn ayaa keliya waxyaabaha soo socda ku xisaabtami kara:

- Miyaa qofka codsiga soo gudbinayaa yahay mid u qalma? (Miyaa qofkaasi leeyahya naafanimada sida uu qeexay sharcigu?)
- Miyaa codsiga fudaydinta ama wax ka beddelku yahay daruuri? (Tan ma go'aamiyo Bixiyaha Gurigu balse waxa go'aamiya shakhsiga; xaqiijinta waxa la codsan karaa in uu bixiyo khabiir caafimaad daaweyneed.)
- Miyaa fudaydinta la codsaday keenaysaa culays dhaqaale ama maamul oo aan loo baahneyn? (Wax ka beddelka, tan keliya waxa la tixgelin karaa haddii wax ka beddelka ay tahay in uu bixiyo Bixiyaha Guriyeynta.)
- Miyaa fudaydinta ama wax ka bedelka la codsaday u baahan tahay wax ka bedel aasaasi ah oo lagu sameeyo nooca barnaamijka guriga?

Bixiyaha Guriyeyntu waa inaanu wax ka weydiin nooca ama heerka naafada. Bixiyaha Guriyeyntu waxa uu u baahan yahay keliya in uu tixgeliyo in codsigu yahay ama aanu ahayn "macquul" iyada oo loo eegayo kharashka iyo wax ka bedelka barnaamijka gurigiisa. Bixiyaha Guriyeyntu waxa uu soo jeedin karaa su'aalo caddeeya wax ku saabsan siyaasadda, sharciga, nidaamka, ama habraaca ee caqabad noqonaya ama caddeynaya sida fudaydinta ama wax ka bedelka la codsaday xidhiidh ula leedahay naafanimada.

WARAAQAHA FOOMAMKA EE MUUNADDA AH waxa ay sameeyaan laba arrimood:

- Waxa ay go'aamiyaan in shakhsi (ama kiraystaha suuragalka ah) uu u qalmo sida uu dhigayo sharcigu fudaydin/wax ka bedel macquul ah, iyo
- Waxa ay xaqiijiyaan in waxa la codsaday uu waafaqsan yahay baahiyaha la xidhiidha shakhsi(yaadka) iyo naafanimadooda.

**Foomamkan waxa abuuray Mashruuca Guriyeynta Cadaaladda ah ee CVOEO. Si toos ah barnaamijka uga la xidhiidh lambarka 802-660-3455 Ext. 106 ama www.cvoeo.org/fhp*

CODSIGA FUDAYDIN MACQUUL AH OO SIYAASADDA AMA NIDAAMKA GURIGA AH

DATE: _____

RE: Request for accommodation of policy at _____
ADDRESS

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

I qualify as an individual with a disability as defined by federal and state fair housing laws.

You have a building located at (ADDRESS) _____ where I am requesting a reasonable accommodation because of my disability. The particular policy or practice for which my accommodation is requested is (POLICY OR PRACTICE) _____

Because of my disability, that policy would restrict my ability to use and enjoy a home in that building. In accordance with my rights under federal and state fair housing laws, I am requesting that you make an accommodation for me regarding the policy referred to above and allow me to (ACCOMMODATION REQUESTED) _____

Please respond in writing, within 10 working days, to my request for the above accommodation.

Thank you in advance for your attention to this important matter.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

Certification by Medical Professional, Care Giver, or Person who has Professional Knowledge of the Tenant's Disability

The accommodation requested above by (NAME OF TENANT) _____
is consistent with needs associated with this individual's disability.

SIGNATURE

PRINTED NAME and TITLE

DATE

CODSIGA WAX KA BEDDEL MACQUUL AH

DATE: _____

RE: Request for a reasonable modification at _____
ADDRESS

Dear _____,
NAME OF PROPERTY OWNER/MANAGER

I qualify as an individual with a disability as defined by federal and state fair housing laws.

You have a building located at (ADDRESS) _____ where I am requesting a reasonable modification because of my disability. The particular barrier or impediment that prompts my modification request is (BARRIER OR IMPEDIMENT) _____

Because of my disability, the barrier or impediment would restrict my ability to use and enjoy a home in that building.

In accordance with my rights under federal and state fair housing laws, I am requesting that you make or allow the following modification of (MODIFICATION REQUESTED) _____

Please respond in writing, within 10 working days, to my request for the above accommodation.

Thank you in advance for your attention to this important matter.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

Certification by Medical Professional, Care Giver, or Person who has Professional Knowledge of the Tenant's Disability

The accommodation requested above by (NAME OF TENANT) _____
is consistent with needs associated with this individual's disability.

SIGNATURE

PRINTED NAME and TITLE

DATE

XAQIJINTA XAALADDA KA SHAKHSI NAAFO AH AHAAN

In federal civil rights laws the definition of disability includes:

A physical or mental impairment that substantially limits one or more of the major life activities of such individual; a record of such an impairment; or being regarded as having such an impairment.

“... Physical or mental impairment means: Any physiological disorder or condition, cosmetic disfigurement, or anatomical loss affecting one or more body systems, such as: neurological, musculoskeletal, special sense organs, respiratory (including speech organs), cardiovascular, reproductive, digestive, genitourinary, immune, circulatory, hemic, lymphatic, skin, and endocrine; or any mental or psychological disorder such as intellectual disability, organic brain syndrome, emotional or mental illness, and specific learning disability.

Physical or mental impairment includes, but is not limited to, contagious and noncontagious diseases and conditions such as the following: orthopedic, visual, speech, and hearing impairments, and cerebral palsy, epilepsy, muscular dystrophy, multiple sclerosis, cancer, heart disease, diabetes, intellectual disability, emotional illness, dyslexia and other specific learning disabilities, Attention Deficit Hyperactivity Disorder, Human Immunodeficiency Virus infection (whether symptomatic or asymptomatic), tuberculosis, drug addiction, and alcoholism.”

[28 CFR § 35.108](#)

As a medical/social service professional with a knowledge necessary to make such a determination, I certify that _____ (NAME OF INDIVIDUAL) qualifies as an individual with a disability as defined above.

[* IMPORTANT: Do NOT reveal the specific NATURE OR SEVERITY of the individual's disability.]

The accommodation requested above by my client, is consistent with the individual's needs associated with their disability.

SIGNATURE

PRINTED NAME AND TITLE

DATE

WARAAQDA FOOMKA CODSIGA SOO CELINTA DEBAAJIDA

DATE: _____

TO: _____
NAME OF LANDLORD

RE: Return of security deposit.

Dear _____:
NAME OF LANDLORD

It has been more than 14 days since I notified you that I have moved out of your rental unit at _____ . I still have not received my security deposit back or a written itemized list of deductions.
ADDRESS

Pursuant to chapter 137, section 4461 of the Vermont state statutes, if a landlord fails to return a security deposit and/or a written list of deductions within 14 days from the date the landlord discovers that the tenant had vacated the unit, or the date the tenant gives the landlord notice that they have vacated the unit, the landlord forfeits the right to keep any of the deposit. Furthermore, "if the failure is willful, the landlord shall be liable for double the amount wrongfully withheld, plus reasonable attorney's fees and costs."

I request that you return my deposit to me at once. You may mail it to the following address:
I thank you in advance for complying with the law.

Sincerely,

SIGNATURE

PRINTED NAME

MAILING ADDRESS

SHEEGISTA RANJIGA LIIDHKA

Lessor = Landlord

Lessee = Renter

Disclosure of Information on Lead-Based Paint and/or Lead-Based Paint Hazards

Lead Warning Statement

Housing built before 1978 may contain lead-based paint. Lead from paint, paint chips, and dust can pose health hazards if not managed properly. Lead exposure is especially harmful to young children and pregnant women. Before renting pre-1978 housing, lessors must disclose the presence of known lead-based paint and/or lead-based paint hazards in the dwelling. Lessees must also receive a federally approved pamphlet on lead poisoning prevention.

Lessor's Disclosure

(a) Presence of lead-based paint and/or lead-based paint hazards (check (i) or (ii) below):

(i) _____ Known lead-based paint and/or lead-based paint hazards are present in the housing (explain).

(ii) _____ Lessor has no knowledge of lead-based paint and/or lead-based paint hazards in the housing.

(b) Records and reports available to the lessor (check (i) or (ii) below):

